BUUGGA

"GARO QIIMAHA NAFTAADA"

GARSOOR UNOQO SIDAY NAFTAADU KU HELI LAHAYD QIIMO NAFEED OO DHAMAYS TIRAN;

BASHIIR CABDI XIRSI "CIIL-TIRE"

TUSMADA BUUGA:-

- Hibayn……..
- Mahadnaq…….....
- Afeef ……
- Hordhac ……..
- Gunaanud……
- Ujeedo……..

GARO QIIMAHA NAFTAADA

TUSMADA BUUGGA:-

1. *WAA MAXAY NAFTU? .....*
   - ✓ *Mid wanaaga ku faraysa……9*
   - ✓ *Mid xumaanta ku faraysa……10*
   - ✓ *Iyo mid wax kuwaydiinasa…….11*
2. *KOBCINTA NAFTA……*
   - ✓ *Maxaa kobciya nafta….12*
   - ✓ *Maxay naftu ubaahantahay koboc ahaan….13*
   - ✓ *Nafta waxyaabaha kobicya…..15*
3. *FAHANKA KA DHEXEEYA NAFTA IYO NOLOSHA……*
4. *MAXAA NATFA UROON MAXAASE UXUN……*
   - ✓ *Inuu hadafka wayni kaa lumo…….18*
   - ✓ *Inaad garanwaydo waxaad kuwacantahay iyo waxaad kuxuntahay……19*
   - ✓ *Inaadan waqtigaaga qiimo uyeelin……20*
5. WAYDIIMAHA IYO WARCELIMAHA NAFTA……
6. KALSOONIDA NAFTA……..
7. ISMUUJINTA ALLE AGTIISA NAF AHAAN……
8. SHARKA IYO KHAYRKA NAFTA……
   - ✓ Waqtiga firaaqada oo kugu bata……..27
   - ✓ Waxbarasho la'aan…….27
9. NAFTAADA JECLOOW "USHEEGO NAFTAADA JACAYLKA"
   - ✓ *Yaad unooshahay dadka mise naftaada?.....30*

- ✓ *Samayso liis ka kooban wax Alaale iyo waxay naftaadu necebtahay iyo wax Alaale iyowaxay jeeshahay…..32*

10. *HIMILADA IYO HANASHADA NAFTA……..*

11. *GEERIDA IYO NAFTA…*

- ✓ *Wax kayaab badan majiraan mawdka…..41*
- ✓ *Geerida dhabtaa……..47*

12. *GUUSHA NOLASHA……*

- ✓ *Waa maxay guushu……..1*
- ✓ *Nafta iyo guusha side isugu baahanyihiin……..1*
- ✓ *Qaybaha guusha……50*
- ✓ *Isbadal……53*

Aaaminaad----

Rrabitaan-------

Ddoorasho------

- ✓ *Hadaf……54*
- ✓ *Qorshe……54*
- ✓ *Han……55*
- ✓ *Dadaal……56*
- ✓ *Kalsooni……58*
- ✓ *Halgan……58*
- ✓ *Dulqaad……59*
- ✓ *Dhiiranaan…….61*
- ✓ *Qisadii AANA ANDROVE……63*

13. *XASILOONIDA NAFTA……*

14. *MUSTAQBALKA NAFTA*

- ✓ *Mustaqbalka dhabtaa……*

HIBAYN

Buugaan "garo qiimaha naftaada" waxaan uhibeeyay

- ✓Dhammaan umada soomaaliyeed.
- ✓Qof kasta oo dadaal adag iyo jihaad kula jira ladagaalanka jahliga nafta.
- ✓Dhammaan walaalahay.
- ✓Waa uhibo Hooyaday **siciido macalin daahir** iyo aabahay **cabdi xirsi "qooje".**
- ✓Sidoo kale waa uhibo dhammaan walaalahay aan wada dhalanay.
- ✓Waa uhibo Dhammaan barayaashaydii dugsiga maadiga iyo quraanka khaasatan macalin **c/rshiid muuse faarax** oo ahaa macalinkii ibaray diinta iyo quraankaba mahadi haka gaadhe.

- ✓Waa uhibo Qof walba oo garanaya qiimaha naftiisa.
- ✓ Waa uhibo dhammaan Asxaabtayda anoon kala soocayn meel kasta oo ay joogaanba.

MAHADNAQ :-

Xaqiiqatan mahad dhamaanteed waxay usugnaatay allaha awooda uleh inuu habeen iyo maalin isku badalo oo iisuuro galiyay inaan qoro buugaan iina sahlay baarista buugaan iina xoojiyay maskaxda aan ku qorayay buugaan, dadna kama maqna meesha oo qof walba hormar waxaa gaarsiiya alle kasokoow dadkiisa waxaan si hoose iyo si sareba ugu mahadnaqayaa hooyaday **siciido macalin daahir nuur** oo mar walba garabkayga taagnayd dhinac dhaqaale iyo dhinac dhiiranaanba garab iga siinasay waxaan leeyahay hooyo abaalkaaga halkan kuma soo koobi karo inaan buug dhan kaqoro mooyee, sidoo kale waxaan umahad celinayaa saaxiibkay **maxamed siciid jaamac** oo runtii ah shaqsi qayb wayn kaqaatay qorista buugan garab wayna uraariciyay soo banbixida qormadaan.

Sidoo kale waxaan umahadnaqayaa dhammaan asxaabtii igalaqayb qaadatay buugaan waxaan leeyahay waad mahadsantihiin dhamaantiin, sidoo kale waxaan umahadnaqayaa qoyskayga oo iyaguna mar walba igu guubaabinayay hamigayga iyo guushayda waxaa sidoo kale xusid mudan in loo mahadceliyo dadka kaqayb qaatay bandhiga buuga.

MAHADSANIDIIN.

AFEEF:-

Waxaan ka cudur daaranayaa **'ka Afeefanayaa'** wixii khalad ah oo ka yimaada qoraalka buugan sidoo kale aysan ahayn waxa ku tala gal ah ma khaldame waa Allaah sidoo kale wixii khalada inoo soo gudbi si aan usaxno, Iskuna day inaad xaqiijiso buugaan waayo wuxuu utabaa-bulaysanyahay qaybaha naftaada.

Si kastaba ha ahaatee waxaan isku hawlay inaan buugaan sida ugu hufan uguna haboon uqoro hadana waxaan qirsanahay aadame khalad kasta uu ka dhici karo inaan ahay ileen bani'aadamku ma dhamaystirne'e sidaa awgeed waxaa marwalba sharfan Allaha ma khaldamaha aha adiga qudhaadu qayb wayn kaqaado akhrinta iyo gorfaynta buuga si wixii khalada loo saxo.

Wixii khalad ah inoogu soo hagaaji lambaradan hoos ku qoron.

- *+ 252 090 7 503249*
- *bashiirsoomaali12@gmail.com*

HORDHAC:-

Dhiganahaan "**garo qiimaha naftaada**" wuxuu ka koobanyahay 14 cutub, cutub walbana wuxuu ka hadlayaa waxa ugaarkaa wuxuuna dhiilo iyo kor-ukac ugu jiraa hormarinta nafta iyo qiimaynta qofnimadaada wuxuuna suuro-galinayaa inuu noloshaada uhorseedo guul iyo hormar.

Waxaan kuugu hambalyaynayaa inaad hayso buuga"**GARO QIIMAHA NAFTAADA**" adiguna isugu hambalyee inaad gacanta ku-hayso buug aad ka helayso aqoonta aad ubaahantahay si aad uxaqiijiso qiimaha naftaadu leedahay waxaan aad ugu faraxsanahay inaan kula wadaago waxa ugu muhiimsan oo qof walba aayihiisa saamayn wayn ku leh waana garashada qiimaha naftiisa iyo aqoontuu ku hanan lahaa garashadaas, waxaan buugaan uqoray in ummada soomaaliyeed fursad loo siiyo siday kuheli lahaayeen qiimo nafeed iyo aqoonteeda, si ay adduun iyo aakhiraba naftooda ooga bad-baadiyaan xanuunada quluubta ku dhaca, inay gacmo shisheeye ku shaqaystaan iyo inay kasbadaan halaaga nafta iyo barako la.aan nafeed.

Ma tahay qof garan waayay qiimaha naftiisa? Matahay qof aanan aqoon ulahayn siduu ku ogaan lahaa garashadiisa nafeed? Mise tahay qof nololoo dhan ka hungoobay hansare iyo himilana aan lahayn?.

Hadaba hadii aad qofkaas tahay keli kuma tihid waxaadse dadka badankiis kaga duwantahay inaad qaaday tallaabadii ugu horaysay oo aad cilladahaas isaga caabinlahayd maadaama aad kutilaabsatay inaad akhriso buugaan.

Aadanuhu waxay kasimanyihiin rabitaanka iyo in madaxoodu kor ahaado oo aan cid kale liidin hasayeeshee waxaad adba ogtahay qofkii

aan lahayn awood iyo tayo uu naftiisa ku qiimeeyo qoyskiisana kaga saaro sabool-nimada iyo jahliga, inuu uhuranyahay in la liido , hadaba hadii aad doonayso inaan lagu liidin waa inaad sare uqaada naftaada qiimaheeda waxna bartaa nafsadaada si tayadaadu ukorodho buugaana wuxuu kugu caawinayaa inaad hesho aqoonta naftaada ee kaa maqan iyo inaad garato qiimaha nafsadaada.

‘‘Hansare iyo himilo toosan waxaa hormuud u ah habaynta iyo hagaajinta naftaada hadaad hiil unoqoto naftaada waxaad si habsami leh ku haleelaysaa hiigsigaaga’’.

“Socdaal weeye noloshuye hadaad mayilka meel saarto waa sadarka koowaadee himilo inaad kusooftaaye waa sabab ujeedo leh inaad sumada qeexdaaye sahan baa lagu dayaa siduu xaal noqdee, qorshaa loo sameeyaa waxqabad saad ugudataaye jaangooyo tiro saxa lagu sargooyaaye la iskama sabeeye noloshee, waqtigu maahan saar meel, maarayn waxaa loo sugaa waa hubaal sidkane gaadidka ay saarantahayna waa sitaac adage sahay lagu jid maro waa aqoonee ninka seegay tusmada naftiisa ku hungoow geedi socodkii”.

Odhaahda Akhristayaashii iyo gor-feeyayaashii buugga

- Dhiganahan **garo qiimaha naftaada** wuxuu dhiilo iyo kor-ukac u yahay ummada soomaaliyeed dhalin iyo waayeelba iyo dadka baadi goobka ugu jira raadaynta qiimaha saxda ah ee nafi ku xasili kadho maalmaheeda dunida.

~Cumar cabdirisaaq

- Akhriska iyo raadaynta buugani waxay kuu furi doontaa wadada aad ku ogaan kadho wareer la'aan dhaqan galinta, hor marinta iyo qiimaha naftaada.

~A. Jaamac burhaan "feer-dhige"

- Buugaan waa dhigane erayada ku qorani ay ku labisanyihiin farshaxan-nimo baraad sare kasoo burqaday, sidoo kale dhiganahani shaqsiyaad badan ayuu naftooda u akhrinayaa waxaana ku jira maqaalo anfacaya nolosheena hogol tusaalana ugu filin jiil walba waa haddii aan ka loox-jiidano.

~A. Cabdalle cabdirisaaq xirsi

- Inkastoo badi ay soo kordhayaan qoraayaasha isku hawlaya dhigidda dhigaalo kala duwan hadana dhigaalkan kooban Ayaan u arkaa fursad dahabiya oo kazoo dhex baxday dadaalaa da' yar. Runtii waa dhigaal aad ku oon baxayso kana sii xiisaynayso bogba- bogga kasii dambeeya waxaadba moodaa inay isku jaan go'anyihiin waqtiga uu soo baxay dhiganuhu iyo baahida loo qabay.

  Magaca dhiganaha oo aadba kaliya ku oon baxayso ayaa ah mid qiimo gaara xambaarsan "GARO QIIMAHA NAFTAADA"! Waa kalmad ay soo hoos galayaan kumanaan waajibaad,ujeedo, hadaf, han iyo garashada saxaad ee nolosha waxaana sax ah inaadan noolaan karin ilaa aad fahanto qiimaha iyo ujeed galinta ruuxdaada ,intaas aynu sheegnay iyo in kabadanba waxay si muunad iyo maskax shiil ah laguugu soo miiray dhiganahaan. Ugu dambayntii waxaan duco iyo mahad celib-ba u meerinayaa qoraaga isku hawlay in uu inoo soo gudbiyo dhigaalkan qiimaha badan, annagana wayne ha inaga yeelo kuwii ka faa'idaysta fursadan qaalligaa xaqiiqdii xiliyadaan ku jiray mayracashadiisa waxaan ahaa mid si tilaab-tilaab wax ooga badalay dhiganahan, isla jeer ahaantaasna waxa uu ahaa mid marba marka kasii dambaysa isii xiiso galinayay.

  "Wayne ayaa mahadsan qoraagii dhiganahaa muunadsan"

  ~Drs: Haboon muuse

CUTUBKA 1AAD

WAA MAXAY NAFTU?

Qof walba oo bani aadam ah wuu garan karaa nafteenu waxay tahay si kastaba haloo garto, naftu waa maxay in yar aynu sharaxaad ka bixino nafta inagoo koobayna?.

Hadaba marka laga hadlayo nafta macnaheeda guud waa wax jira quraankana waxaa kusoo arooray aayado tilmaamaya in naftu tahay waxa kaliya ee basharka lasiiyay ee ugu qaalisan naftu waa waxa jecel inay ogaato masiirkeeda jano ama naar sidoo kale nafta waxaa loo qaybiyaa sadex qaybood oo kala ah.

- ***Mid wanaaga ku Faraysa***
- ***Mid xumaanta ku faraysa***
- ***Mid wax kuwaydiinasa[sababma aad waxaan usamaysay]***

o MIDA WANAAGA KU FARAYSA

Naf waxaa jirta kuu kala soocasa wanaaga iyo xumaanta sidoo kalana kuu leexinaysa dhanka wanaaga kuuna sheegasa waxa adiga kuu wanaagsan Adduun iyo Aakhiro, waana nafta ugu hardanka badan nolosha qofka maxaa yeelay waxay dagaal kula jidhaa shaydaan asagoo kuu caabinaya xumaanta iyo waxay necebtahay naftaas wanaagsan, sidoo kale waa naf jecel inay kuu sheegto sharkaaga iyo xumaantaada naf ahaantadana aad iswaydiiso maxaa shar addunka kuu yaal maxaase khayr kuu yaal sida aaduxisaabiso lacagtaada uxisaabi dunuubtaada iyo khayrkaaga ogoowna in waxwalba la xisaabindoona maalin un.

- ***MID XUMAANTA KU FARAYSA***

Naftani waxay Aalaaba saf dheer kula jidhaa shayaadiinta si ay wanaaga ooga weeciyaan nafta ku faraysa khayrka ilaahayna wuxuu yiri nafta wanaagsan waxaa cadaw ku ah shaydaan iyo shahwaadka dunida naftan waxay geed dheer iyo geed gaabanba ufuushaa si ay qofka useejiso khayrka adduun iyo midka Aakhiraba waxayna kudul istaagtaa qofka isku bandhiga, naftan iyo shaydaan waa labo cadaw inkastoo markasta qofka bani'adamka cadaw ay ku tahay nafta iyo shaydaankuba hadana waxaa jirta naf usoo xaydatay xumaanoo dhan waxaana ka bad baadi kara qofka adkaysta naftiisa wanaagsan.

- ***MID WAX KU SU'AALASA***

Waxaa jirta naf ku su'aalaysa waxaad samaysay inkastoo culimada saynisku ay yiraahdeen naftan waxaa usaaxiib ah dadka caqliga leh maadaama ay wax iswaydiiyaanba garanayaana waxay saxeen iyo waxay khaldeen iswaydinayaana sababta ka dambaysa waxaas.

Waa naf utaagan inay ku xisaabiso adiga wax walbana kula saxdo ha ahaato afkaarta, go'aanada iyo wixii la halmaala.

Waqti badan inaguma qaadanaso ogaanshiyaha nafta, qof walbana asaga natiisa qiimayn kara sida buugu tilmaamayo.

Balse waa wax laga maar-maan ah inaan wax ka ogaano nafaheena kadibna aan qiimayno ogaanana waxaan ku fiicanahay iyo waxaan ku xunahay, baro fursadaha ku horyaala iyo caqabadaha ku hortaagan sidaad ooga gudbi lahayd fursadahana ooga faai'daysan lahayd qofku markuu si xirfad leh uu uisticmaalo waqtigiisa ayuu si xirfad leh uqiimayn karaa naftiisa waa muhim inaad dareento naftaada sidoo kale iswaydii waxaad kuxuntahay iyo waxaad ku fiicantahay aalaaba qorshee garana qiimaha naftaada ay leedahay waaqica sii sawiro

markaad sawirato waxaad jeceshahay waxaa caqligaaga hoose kusawirmaya sawir muqaaleedka aad jeceshahay inaad noqoto mustaqbalka is taag hada oo soo qaado buug waxaadna qortaa intaad ka ogtahay naftaada kadib waxaad si cad ufahmaysaa waxay tahay inaa qabato mustaqbalka dhaw qofka bani'aadamka ah waxuu ka koobanyahay labo LAHAANSHO IYO AHAANSHO.

Lahaanshiyuhu:

Waa waxaad adigu leedahay sida hantidaada, gawaadhidaada iyo wixi la halmaamala balse,

Ahaanshiyuhu:

Waa shaqsiyadaada dhabtaa iyo waxaa tahay adigu yacni sidaad adduunka ku timidey awalkii inaad garataa arinkaasna waa tiir wayn oo caawinaya inaad mustaqbalka guul gaadho.

KUMAA TAHAY ADIGU?!!

Kumaa tahay adigu maalin walba waxaa usocotaa gaaridda yoolkaaga, maalin walba waxaa dareentaa daal si aad ugaadho hammigaaga boodh ayaa kusoo gaadha, dhidid ayaa kaaga yimaada sidii aad mar un u arki lahayd shaqsiyadaada oo hor-madhay balse haddii aan kuu imaaado oo aan kuwaydiiyo su'aal ah kumaa tahay ma iiga jawaabaysaa, ma ii tilmaami kartaa qofka aad tahay markaan sidaas leeyahay kaama doonayo magacaaga, qabiilkaaga iwm. Waa hubaal oo badankeenu ma ogin shaqsiyadeena waxaynu ku wareegnaa xayndaabka lahaansheheena mid ila fahan sidaan horay kusoo sheegnaynba qofku wuxuu ka koobanyahay labo waa lahaansho iyo ahaansho, lahaanshuhu waa waxaad leedahay sida hantidaada ama dharkaaga balse ahaanshiyuhu waa shaqsiyadaada dhabtaa yacnii sidaad adduunka ku timid awwalkii inaad garantaa arinkaasna waa tiir wayn oo kaa caawinaya inaad mustaqbalka guul gaadho, hadaba akhriste istaag hadda oo soo qaado warqada ama buug waxaadna qortaa inta aad ka ogtahay naftaada kadib waxaad si cad ufahmaysaa waxay tahay inaad qabato mustaqbalka dhaw.

Adigu hadda is dheh kumaan ahay **who am** I?

Fariintaydani waxay utaagantahay iftiiminta ruuxiga sida sumadeeda ka muuqatana waa qoraal bar-bilawgiisu yahay nolol baraarugsan noqo ruux nafci dhaxal gala ka hela.

CUTUBKA 2AAD

KOBCINTA NAFTA.

Naftu waxay ubaahantahay in la kobciyo in la wayneeyo waxaa la yidhaahdaa akhlaaqiyaadka iyo dhaqanka iyo kabcinta naftu waxay ubaahanyihiin hal- adayg iyo joogtayn iyo ku cel-celin wayn, maanta markii lagu wacdiyo oo wax laguu sheego waxaad is oronasaa sidee wax uwadaa oo waa iscanaa-nanasaa markaad guriga tagtana waxaad leedahay waxaad ubaahantahay casiimo adag iyo inaad naftaan geed ku xidho oo tiraahdo si kor ah ilaahay kabaq, aroortase kolkuu waagu baryo wixii oo dhan midhba kama xasuusatid sidaa ajligeed soomaalidu waxay yidhaahdaan ***"wacdi iyo waydba habeen baa lagu seexdaa"*** iyagoo oogala-jeeda wax walba waa markaa horoo laguu sheegayo wax kale oo kasii dambeeya majiraan.

- ***Maxay naftu ubaahantahay markaas.***

Waxay naftu ubaahantahay in hogaanka loo hayo loona adkeeyo lana kobciyo, waxay ubaahantahay in la barbaariyo, waxay ubaahantahay in la ilaaliyo oo lagu ilaaliyo dhaqanka fiican ,oo lagu ilaaliyo akhlaaqda wanaagsan , oo lagu ilaaliyo tawxiidka wanaagsan,naftu waxay ubaahantahay in la daahir yeelo oo laga daahir yeelo xanuunada qaluubta ku dhaca sidoo kale in laga ilaaliyo nafta dulmiga iyo waxay jeceshahay waxay sidoo kale naftu ubaahantahay in laga daahir.yeelo,***Gaalnimada,shirkiga,dulmiga,nifaaqa,xaaraanta,riyaa'a,xanta, cunida ribada, magac doonka iyo maamuus doonka***, naftu inaad muuqato way jeceshahay waloow wacdina ka muuqa ama khayr ka muuqo in lagu tilmaama waad jeceshahay waxaase khayr leh qofku inuu mutawaadic yahay oo ilaahay yaqaan.

-**OGOOWNA**: Hadii shaydaanku kaa celin-waayo khayrka wuxuu isku dayayaa inuu ku dar-darsiiyo khayrka waliba adigoo khayrkii samaynaya hadana inuu khayr bilaa ajara kaa noqdo, inuu camalkaaga ka dhigo mid ikhlaas beelay ama mid aad magac iyo maamuus ku raadinaysay oo aad ilaahay agtiisa waxba aadan kaga doonayn waayo nabiga (scw) wuxuu yidhi aakhiro kuwo naarta loogu horshido doona waxaa kamida, ku' wax bixin badanaa, ku' quraan akhris badanaa, ku' jihaad badnaa oo geesi ahaa!! sababtu waa maxay markii nabiga layidhina wuxuu yidhi waxay ahaayeen kuwo ku rabay maamuus iyo magac lana yidhaahdo hebel wuu wax-bixin badnaa, hebel wuu quraan akhris badnaa, hebel wuu jihad badnaa intaas ayay kumutaysteen in naartaas lagu shido ilaahay agtiisana waxba kuma lihid intaad doonasayna lagu yidhi haduu shaydaan uu awoodi waayo inuu cibaadada kaa leexiyo wuxuu isku dayayaa inuu ku dar-darsiiyo cibaadada qudheeda oo uu ku dhinac marsiiyo waxaad maalinkaasoo dhan samaynaysayna aysan ilaahay raali galin.

Waxaynu ubaahanahay inaynu nafta si aada uilaalino, in nafta aad ka awood badato oo madaxeeda hoos uceliso mutawadacna aad iska yeesho, sidoo kale nafta udiid anaaniyada iyo inay tiraahdo "**ANAA**" naftu way badanyihiin waxay doonayso meesha ay kusocotaana waa mahlako waa dhul khatara isku soo duub waxaad ubaahantahay inaad nafta hogaanka uxajiso inaad xaasidnimada ka ilaaliso, oo bakhaylnimada ka ilaaliso, oo islawaynida, oo adduun jacaylka ka ilaalisid ilaahay subaxaanahu watacalaa wuxuu tilmaamaya qolada janad galaysa.

وأمامن خاف مقام ربه ونهى النفس عن الهوىٰ

فان الجنة هي المأوى

Ilaahay (sw) wuxuu leeyahay janno hadaad doonayso nafta waxay doontaba diid.

Sidoo kale nin gabyaa ah ayaa wuxuu yiri, **و خالف النفس و الشيطان وعصهما**
"War naf iyo shaydaan waligaa caasi"

Xitaa wuxuu yiri naf iyo shaydaan haday isku dayaan inay kuu nasteexeyaan, nasteexadooda ha abaarin hana aqbalin waxa ka dambeeya meel khatara ayay kuu wadaane.

Waxaa haboon nafta inaad kaxakamayso waxa ukhatartaa tawxiidkana aad ku toosiso, tawxiidka maxaaa kamida markaas waxaa kamida inaad rumaysato inuu ilaah kali yahay, waxaa kamida inaad rumaysato in ilaahay agtiisa wax walbaa yaalaan hadaad rumaysato wax walba in ilaahay gacantiisa ku jiraan wax walba oo aad ubaahato asagaad waydiisanaysaa.

Nafta waxyaabaha kobciya maxaa kamida marka waxaa kamida in.

- *Nnafta la ogoysiiyo in naari kadambayso*
- *Nnafta la ogoysiiyo in shaydaan weerer ku yahay.*
- *Nnafta la ogoysiiyo in ay wax walba awoodo*
- *Nnafta la ogoysiiyo inay dhimanayso*
- *Nafta la ogoysiiyo inay haysato waqti ku filan oo aanay waxba ka naaqusayn haday si xirfad leh u isticmaasho waqtigeeda.*

Nafta hadii intaas lagu xoojiyo laguna kobciyo waxaa macquula inay noqoto naf uhogaansan go'aanada rabbi (sw) marnaba naftaada ha uogolaan inaad u aqbasho waxay kuula timid maxaa yeelay waataan niri nasteexaynta naf iyo shaydaan ha aaminin maxaa yeelay waxaa ka dambaysa shalayto hoog iyo halaag jahanamee, naftaada iyo ehelkaagana ka ilaali naar.

يا أيها الناس قوا أنفسكم وأهليكم ناراً

CUTUBKA 3AAD

FAHANKA KA DHEXEEYA NAFTA IYO NOLOSHA.

Waxaa xaqiiqaa in nafta iyo nolosha ay ka dhexeeyaan xidhiidh rabaaniyeed noloshuna qiimo malahaateen nafta oo aanan jirin naftuna wax qiimaa malahaateen hadaysan nolosha oo aan jirin sidaa la'aadigeed waxaa ka dhexeeya fahan wayn oo ah in naftaadu fahanto nolosha maxaad utimid, nolosha maxay tahay sababta laguu keenaywaa muhim inaan fahano fahanka labadaas shay.

Qofka bani'aadamka ah waxaa loo baahanyahay inuu noloshiisa nafta fahansiiyo oo garta cawaaqibta ka dhalan lahayd haduusan jireenba fahansii naftaada nolosha oo ku dheh waxaa tahay bashar nolosha loo keenay inuu dantiisa aakhiro fiirsado waxaa jirta bani'aadamku mar uu xawaaynka ka liito oo kasii hooseeyo hadaba markaasi waa markee, waa marka qofku uu indhihiisa ku arki waayo khayrka oo uu xumaanta ku doorsado waa markuu dhagahiisa wanaaga ku maqli waayo oo uu xanta iyo barabugaandada ku weeleeyo waa markuu qalbigiisa wanaaga ku weeleen waayo oo uu xumaanta ku kala dhidbo qofku haduu garanwaayo intaas waxa loo siiyay waa dhib iyo fahan xumo ka haysata naftiisa iyo nolosha, ilaahay ayaa ayaadkiisa wuxuu ku leeyahay duul baynu jahanama ugu tala galnay jin iyo insiba kamid ah.

Ahlu naarka maxaa u calaamada , waxaa u calaamada buu rabi leeyahay (sw) waxay leeyihiin quluub aanay waxba ku fahmin, waxay leeyihiin indho aanay waxba ku arkin, waxay leeyihiin sidoo kale dhago aanay waxba ku maqal hadaba macnaheedu maahan inaanay waxna arkaynin, waxna maqlaynin, waxna fahmaynin ee waxa weeyaan waxay kasoo dhaceen darajadii bani'aadamtinimada oo

ashyaadaan lasiiyay waxay u adeegsadeen inta xooluhuba u adeegsado xooluhu inay bahal ka cararaan aragaba way u adeegsadaan, caqligoodana way u adeegsadaan, dhagahoodana way u adeegsadaan hadaad intaas un noqoto oo aad waxna cunto waxna cabto dee xawayaankaas waxba kama liidatid waloow aad kasii hoosaysidba, waa inaad ka kormartaa darajada xawayaanimada goormaad ka kormari kartaa waxaad ka kormari kartaa hadaad mustaqbalkaaga garanayso fahana ka haysato noloshan aad nooshahay akhlaaqiyaadkaagan aad wanaajiso intaasina haday kaa hoos baxdo cawaaqib xumaad kunoolan abid waxaadna kamid noqonasaa duulka uu Alle (sw) jahanamo ugu talo galay, ilaahay baan ka magan galnaye.

Al-muhim waa inaad fahantaa waxa noloshan laguu keenay ee aadan noqon qof dhinac carara nolosha, qofka nolosha dhinac carara wuxuu lamid yahay ayga , ayga hadaad biyo siiso wuu haraaryoon hadaad cayrisina wuu haraaryoon labadaba waa isugu mid kolkaad nolosha daba cararto adoonan fahansanaynba waxay tahay waxaad lamidtahay aygaas marwalba soo haraaryoonaya.

Waxaa loo baahanyahay qofku inuu naar iska ilaaliyo adduunka waxa loo joogo oo ugu wayna waa labo un waaa kacararka naarta iyo aragtida ALLE (sw) sidoo kale inaad kamid noqoto kuwa janada ku dalxiisa oo ku damaashaada waligood hadaad labadaas lumiso waxaad lamid tahay xoolo darajadaadiina waad ka hoos madhay nolosha muuqaalkeeda hoosana waxba kama aadan fahmin ,yacnii fahan guud kama haysatid xidhiidhka ka dhexeeya naftaada iyo noloshanba waa muhim inaad fahanto nolosha muuqaalkeeda hoose ilaahay (sw) wuxuu leeyahay gaaladu maysan fahmin nolosha muuqaalkeeda hoose waxay garanayaan muuqaalkeeda sare fookhyo ha dhisaan ama cirkaha duulaan waxba uma siyaadinayso aakhirase qaflo ayay kaga suganyihiin waa mooganyihiin sidaa la'aadigeed alle (sw)wuxuu gaalada ku tilmaamayaa maalinka aakhiro inuu

calaacalkoodu kamid noqon doon "**YAA WAYLANAA** war waanu mooganayn arinkaan"

" يا ويلنا قد كنا في غفل من هدا " sidaa awgeed maalintaasi wuxuu bani'aadamku tamaniyo waxaa kamid noqon doonoyaa mar un dunidii kuu celiyo waa waqtigan aad maanta sheekada ku bixinayso oo beel daraynayso waa waqtiga aan maanta wax badan qiimo agtaada kalahayn waa noloshan aad maanta isleedahay maxaad uhaysata dadku waxay isleeyihiin maxaad haysataa xoolo malihid magac malihid noloshan aad hiifayso ayaad ku warari doontaa maalinkaas Alloow yaa mar kale kuu soo celiy tii!!.

Sida awgeed ayaa alle leeyahay (sw)

{حتي إدا جاء أحدهم الموت قال رب ارجعون لعلي

أعمل صالحاً فيما تركت كلا إنها كلمت هو قائلها.َ

Rabi (sw) wuxuu inoo tilmaamaya bani'aadamku wuxuu ku calaa-cali doono inay tahay "**ILAAHOOW ICELI**" xagee laguu celiyaa waxaad raadinayso waa maxay waa waxaad maanta haysato intaad maanta haysato ayaad tamaninaysaa intiina inay maanta ku dhaafto maahan sidaa awgeed ninka maanta tan fahmi waaya waa garaad laawe , caqli iyo aqoona waxaa leh ninka garta war waa maxay danta wayne soo socoto siina diyaarsada wuxuu ooga bad baadi lahaa, rabbina wuxuu Aakhiro ku tilmaamayaa inay sheegan doonaano oo qiran doonaan inaanay caqli lahayn markaanu dunida joognay hadaan wax maqli lahayn amase hadaanu garaad yeelan lahayn dad caqli usaaxiiba hadaanu noqon lahayn ma aanu noqoneen asxaabta saciira, "**saciira caqli laawaa gala**" maalinkaasay qiranayaan dambiyadooda waxna uma tarayaso qirashadooda hadaba walaal waxaa jirta xili dambiga la qirto xiligaasna waa hadda, hada haday dhamaatana mar kale kuma soo maraysa hadadaan.

Markaa maxaa loo baahanyahay waxaa loo baahanyahay inaad fahanto waaqica dhabta ah ee noloshan aad nooshahay sidoo kale waa inaad fahantaa war maxaa noloshan la iikeenay war muxuu yahay danta la iga leeyahay mawaxaadba uhaystaa nolosha in laguu keenay inaad ubaahantahay oo kaliya dad badan ayaa waxay uhaystaan in noloshan loo keenay dano ayaga ukhaasa isku day inaad fahanto noloshaan naftaadana fahansiiso waaqcia jira xili walba waa lagaaga baahanyahay inaad fahan gooniya uyeelato noloshaada inaguna waxaan isku daynay inaan wax kaaga iftiimino fahanka ka dhexeeya naftaada iyo noloshaada intaasna hakuugu filnaato fahan gaara balse haka daalin naftaada inaad usheegto runta.

"AQOONTA LAGUU SHEEGAYO WAA TA, CADAABKA KAA BADFBAADIS"

Bani'aadamka xikmadiisuna waa inuu fahmo dunidan xayn daabka looga dhigay sharka iyo shahwaadka garaadkiisana ku meel maro waxa ugu qaalisan ee agtaada yaalana waa iimaanka waayo waa waxa naar kaa bad-baadiya ee jano aad ku hesho, wax bani'aadam helo waxaa ugu wayn jano iyo aragtida rabi (sw) iimaan baana lagu helaa wax bani'aadam ka nabad galo iyo balaayo laga baxsadana naar baa ugu wayn ayadana iimaanbaa lagaga nabad galaa wax ka qaalisan ma jiraan iimaanka.

Maxaynu oga, god leenahay iimaanka marka, iimaanka waxaan ooga god leenahay waa waxa kaliya ee aad ku fahmi kadho noloshan inaysan ahaynmidii saxda ahayd ee loo abuuray naftaada ugu dambayntii lahoow garaad kuu kala saara waxa dhalanteedka ah iyo waxa dhabta ah.

CUTUBKA 4AAD

MAXAA NAFTA UROON MAXAASE UXUN

Inkastoo qof walba garanayo waxa naftiisa uxun iyo waxa uwanaagsan hadana waxaa jira waxyaabo badan oo marwalba nafsadeena uxun islamar ahaantaasna aynaanu kajawaab celinayn inagoo umoodayna inaan marnaba arag waxyaabo nafteena xumeeya inkastooy jiraan dad waxyaabahaas arka hadana waxaynu isku dayaynaa inaan wax ka iftiimino maxaa inoo xun maxaase inoo roon.

Aynu ku hormarno waxa nafsadeena uxun nafta waxa uxun way badanyihiin waxaa uxun wax walba oo xanuujiya balse ogoow wax walba oo ina xanuujiya inooma xuma tusaale ahaan xanuunka waan necebnahay mana jidho cid jecel inay xanuusato sidaa la'aadigeed xanuunku waa wax ina xanuujiya balse inoo roon maxaa yeelay waxaa lagaa rogayaa dunuubta aad gashay qaar kamida xanuunkuna waa dambi dhaafe waxyaabaha ugu waawayn ee nafteena uxun waxaa kamida.

1. INUU HADAFKA WAYNI KAA LUMO:

Qofku markuu muslim noqdo janno waa gool ama hadaf uu raadicaynayo laakiin nolosheenu waxay leedahay ahdaaf yar-yar oo kasokaysa hadafkaas waynwaxaa loobaahanyahay ahdaaftan yar-yar ee soke inay ukhidmayso hadafka wayn yacni wax kasta oo hadafkaaga kaa weecinaya waa inay yihiin waxaanan macno badan agtaada kasamaynayn haday hadafyadaas yar-yari kaa mashquuliyaan oo kaa weeciyaan hadafka wayn waxay lamid tahay inaad ku qasaadhay imtixaankii aakhiro waana wax noloshaada uxun.

Hadafka wayni waxyaabahan soke oo dhan ma ahan waxay ceeryaamo ama caad kaa galinkaraan hadaadan adigu markaaga hore ilaashan sidaa la'aadigeed muxuu yahay hadafkaasi, hadafkaasi waa hadafka waynee aakhiro haduu kaasi kaa lumana waxay lamid tahay waad qasaartay idan waxay kamidtahay waxyaabaha ugu waynee nafta xumeeya walibana uxun inuu hadafkaaga saxda ah kaa lumo hadaba ilaasho hadafka iyo danta aad utimid dunidan sidoo kale maxaa kamida hadafka wayn waxaa kamida.

1. Aakhiradaada inaadan isa seejin

2. Salaadaada inaadan seegin

3. Sadaqada inaadan seegin

4. Shiqi inaadan noqon yacni caasi waalid iyo caasi rabbi.

2. *. INAAD GARAN WAYDO WAXAAD KU FIICANTAHAY IYO WAXAAD KU XUNTAHAY*

Qofku inuu iska noolaado uun iska seexdo uun, iska baashaalo uun naftiisa uma fiicna sidoo kale qofku inuusan aqoon wuxuu ku wacanyahay oo xirfad u ah iyo wuxuu ku wacnaynba oo aan xirfad u ahayn way wanaagsantahay inaad naftaada ka ogaato waxay jeceshahay inay noqoto iyo waxay necebtahayba hadii kale waxaad noqon qof lasito oo dadka kale afkaartooda ku shaqeeya tusaale ahaan hadaad tahay arday dhigta dugsisare oo aadan kala aqoonba naftaadu kay jeceshay iyo kay xirfada uleedayba *Arts* iyo *science* deetana ay asxaabtaadu ku yidhaahdaan hebaloow ama heblaayooy arts baynun aadnee ina hor qabo deetana aad tiri waa yahay adigoona ka fikirin waxad rabto iyo waxadna rabinba sidoo kale aadan aqoonba

labadaas maado kaad ku fiicantahay deetana aad dadkaas artska aaday aad daba gasho dabadeedna aad tiraahdo anigu hamigaygu arts ma ahayn waa gooraad dhex bartanka taagantahay sidoo kale aad aragtay inaadan arts ku fiicnayn deetana aad ku feel garawda maadadiiba hadaba maxaa usababa waxaa usababa feel garawgaas markaagii hore ayaaba aadan aqoon waxaad ku fiicnayd iyo waxaad ku xumayd dabadeed meel walba waa loss-garoowin adoonan ogayn una qaba inay naftaadu liidato maya ma liidatid ee waxaadan aqoon waxaad ku fiicantahay iyo waxaad ku xuntahay ma jiro qof damiin ah ee waxaa jira qofaan aqoon halkuu ku fiicanyahy deetana waxaa soo shaac baxaya intaad ku xumayd adigoona aqoon intaad ku fiicnayd al-muhim ogoow arimaha aad kufiicantahay si aad uguulaysato naftaada qiimee oo qadarin ku samee si aad u ogaato waxa kuu xun iyo waxa kuu fiican ee aadan noqon qofkaasoo kale ee ku shaqeeya dadka afkaarahooda naftaada garo si aad adigu fikirkaaga ugu socoto amaba fikirkaaga loogu socdo.

3. INAADAN QIIMO UYEELIN WAQTIGAAGA

Waqtigaaga inaad qiimo uyeelin waxay kamid tahay waxa nafsadaada halaagaya oo uxun ku xisaabtamida waqtiga ,ilaalinta waqtiga,faa'iidada waqtiga,gorfaynta waqtiga, intaba adiga waa kuu faa'iido, ilaasho waqtigaaga waxaa kuu ilaashamaya noloshaada waqtigaagu waa noloshaada maalin walba oo tagta waxaa tagaya cimrigaaga wuxuu yidhi caalimkii waynaa ee xasan AL.basari

" إبن آدم إنما أنت أيام كلما دهب يوم دهب بعضك"

[Ina aadanoow adigu waxaa tahay maalmo marka ay maalini tagtaba adiga badh kaamida ayaa tagaya].

Qofka caqliga leh waa kan waqtigiisa si nidaamsan ooga faa'idaysta oo aan waxyaabaha bilaa macnigaa ku beeldarayn ugu dambayn waqtigaaga ka faa'idayso.

“ Nolosha iyo waqtigu waa labadaada bare ee dunida ugu wanaagsan noloshu waxay ina bartaa adeegga wanaagsan ee waqtiga, waqtiguna wuxuu ina baraa qiimaha ay noloshu leedahay sidoo kale waxaa jira tuugo aanan cidna ciqaabin cidnana aananxukumin xitaa adigu aadan xukuminwaa kuwa waqtigaaga kaa xada”

Waqtigu wuu daahayaa marka aad sugayso, wuu dag-dagayaa marka aad baqaysid, wuu dheeryahay marka aad murugaysantahay.

Wuu gaabanyahay marka aad faraxsantahay, ma dhamaanayo marka aad xanuunsantahay, waa dilaa marka aad jaanis haysato, wuu joogsanayaa marka aad jacayl ku jirtid.

Hadaba walaal waqtigan saacad laguma xisaabiyo kaliya wuxuu isla badalayaa garaaca wadnahaaga, caqligaaga iyo xaaladaada nafsiyeed.

Xusuusnoow waqtigaan wuu dhamaanayaa maalin un kan qadhaadh iyo kan macaanba sidaa darteed ooga faa’idayso wax ku anfacaya aakhiradaada iyo adduunyadaada.

Xusuusta nolosha ayaa idin ka hadhaysa markaad geeriyootaan oo uu waqtigiinu dhamaado, iinsaanku ma geeriyoodo ilaa uu ka helo wixiisa (Irsaaqada).

Ayaamuhuna waxay jarayaan qalbigeena, saacaduhuna waxay qorayaan xusuusteena, geeriduna waa ay inoo yeedhaysaa waliba yeedhid dhab ah waxayna leedahay “anigu adigaan ku doonayaa waxan arkaa inaad adduunyada jeceshahay, adduunyada waxaa gooyay dadkii caqliga lahaa badanaa intaad nafihiina khiyaamaysaan anigu waan idiin yeedhayaa hadaad I ajiibaysaan waxaana idin kugu yeedhayaa inaad nafihiina naar ka bad-baadisaan”

Waqtigaagu waa waxa ugu mudan ee aad haysato ee ku dadaal cidda mudan inaad siiso.

Bani’aadamku hantida ugu wayn ee ay haystaan mid walba ku taajira, ku faqiira, ku jaahila, ku caalim ah dhammaantood hantida ay kasimanyihiin ee ay wada haystaan waa waqtiga.

Carabtu waxay ku maah-maahdaa waqtigu intuusan ku jarin baa lajaraa.

Ugu dambayn waqtigaaga ka faa'idayso.

CUTUBKA 5AAD

WAYDIIMAHA IYO WARCELIMAHA NAFTA

Qofka bani'aadamka ah waxaa jirta marar badan oo naftiisu ay su'aalo weydiiso inuu qofku ka warceliyana looga baahanyahay waydiimaha naftiisa ha ahaadaan waydiimo xun ama waydiimo wanaagsan labadaba waa kugu khasab inaad kawajaabto oo ka warceliso hadaba su'aashu waxay tahay sidee nafta loogu jawaaba oo loogu warceliyaa waliba si saxa oo aan murugo lahayn inkastoo waxaad khalada oo ay naftu dareento adiguna isla intoo kale aad dareemayso wada sheekaysigaa labo ah maahee naf ahaantu waa naftaadii oo dareenka waa dareemin hadaadan adigu markaaga hor uhorseedin xumaan iyo shar aan kalaabasho lahayn waqti kale ,hadaba sidee naftaada ugu warcelin una waydiin waxaad dareemayso waxaad ugu warcelinasaa inaad marka hore aad dareen uyeelato xasiloonida naftaada daganaana umuujiso si aadan isku khaldin adigu , su'aashana aadan u khaldin sidaasna aadan ku hoogmin ileen wuxuu waa naftaadiiyee khaladka ka ilaali mararka qaar waxaa dhacda naftu inay kuwaydiiso su'aalo dhiirigalin ah waliba adigoo og inaadan wax tayaa lahayn noloshana ka quustay iskana dhagoolaysiinaya su'aalaha nafta , waliba naftoo ku dhahaysa waxtarkaagii meeyay , tayo mawaadan lahayn , istaag oo boodhka iska jaf iyo su'aalo badan oo si maskixiyan ah kuugu soo dhacay adiguna aad is moogaysiinaso mararkaasoo kale naftu waxay doonaysaa hormarkaaga oo waxay rabtaa inay si xoogan ooga qayb qaadato tayayntaada inkasta oo aad marwalba tahay wixii tayaynta ubaahnaa hadana adigaa kasokeeya oo ka quustay noloshii naftu ma quusato ka hor intuusan qofku quusan qofku kolkuu noqdo qof aan waxba ku toornayn oo noloshan macnaheeda fahmi waayo naftuna way la quusata inkastoo ay aalaaba marar badan waydiinayso su'aalo ah maxaad laquusatay? Qof liita matihid hadana aad iska dhaadhicisay inay been kuu sheegayso ayba kol hore

quusatay tahayna waxa kugu dhaliyay inaad quusato waligaa intaad nooshahay ha quusan nolosha quusashadaa ugu xun.

Hadaba isku day inaad fahan gooniya uyeelato su'aalaha kaaga imaanaya naftaada maxaa yeelay waa su'aalo saxa una baahan jawaabo saxa naftaadana been haku sasabin maxaa yeelay maalin ayaa ogaan doontaa inaad ahayd qof dhayil iyo dhalanteed ku noolaa dhabtana ay noqonasa hormar qof kale sameeyay kuuna noqon doona jawaabtii saxda ahayd ee ay maalinkii ku waydiisay naftaada aadna usheegtay wax khalada maantoo kale ayay ku qabsanasaa su'aashaa qaladay maalinkii hadaba naftaada usheeg runta maxaa yeelay wax badan ayay kaa saacidasaa run ahaanshaha naftaada, aamin naftaada ,lasheekayso naftaada , caawi naftaada ,jecloow naftaada, hormarka ay rabto gaarsii, intaas hadaad usamayso ogoow adaa guulaystay hadaadse iska dhago tidho khiyaalina aad ku jidho una haysato inay naftaadii istarees qaaday xaqiiqdii cida istarees qaadi doonta waa adiga maalinkaad ogaato jawaabtii saxda ahayd.

Al muhim naftu waxay kamidtahay waxyaabaha qofka raadicaysiiya guusha rabi (sw) ogoow hadaad naftaada lasheekaysan waydo oo runta usheegi waydo waxay jaar lanoqonasaa duulkii xumaa oo ah shayaadiinta kadib waxaad kamid noqonasaa qof uu shaydaan naftiisa lasheekaysto maxaa yeelay naftaadii waad siin wayday waxay shalay kaa rabtay waadna dayacday hadaba ka taxadar naftaada runta usheeg ka dhaaf beenta inteebaan ku noolayn caalam qiyaal ah oo aynaanu waligeen tagin ugu dambayn ma jirto runta wax nafta ooga fiican naftaada haku maaweelin erayadaan , waxba matihid , waxba ma yeelan kadhid , hormar ma gaadhi kadhid , hadafkaaga ma raadicayn kadhid iwm intaas hadaad naftaada subax walba ku weelayso ogoow waligaa hormar ma gaadhaysid, ugu dambayntii naftaada runta hakala bakhaylin usheeg xaqiiqada dhabta ah iyo waxaad tamaninayso cutubkan waa uu iska koobanyahay balse xaqiiq waxaa ah inaan halkiisii ku ekeenay muhiimaduna ay tahay wax yar

oo faa'ido wayn leh ujeedkuna maahan inaan waraaqadaha kuu buuxino inagoonan hadafka wayn raadicaynayn iyo in runta loo sheego nafta, runta wax kafiican majiraan hormarkaaguna halkaas ayuu ku jiraa "haah" halkaas ayuu ku jiraa hormarkeeno dhan.

CUTUBKA 6AAD

KALSOONIDA NAFTA

Maxay tahay kalsoonida nafta waan ognahay inay kalsoonidu tahay wax qaaliya balse intaas kuma dhaafano "haa" way tahay wax lama huraan ah,way tahay wax nolosheena qaab wayn uyeelaya waxaana kuu sheegayaa micnaha dhabtaa ee kalsoonida , kalsoonidu waa shayga ugu muhiimsan ee uu ruuxu ubaahanyahay si uu uga guuro meel una tago meel kale sidoo kale kalsoonidu waa awood aad dadka ugu sheegi kadho asal ahaan waxaad tahay iyo halkaad kasoo jeedo xitaa walxaha aan noolayn ayaad ku baraysaa shaqsiyadaada bal wax ka ogoow qisadii"**cumar binu khadaab**" allahaa ka raali ahaadee kolkuu hayay khilaafadii islaamka reer masar waxay caado ulahaayeen caado xun oo ahayd in marwaliba oo uu wabiga niil uu biyaha yareeyo inay gabdhahooda kasoo saaraan mida ugu qurxoon kadibna ay wabiga ku ridaan mudo markay sidaas ahayd maalin ayaaa arinkaas waxaa ogaaday cumar iyo saxaabadii nabiga (scw) kadib warqad ayuu usoo qoray cumar si ugu sheego inay qalad wayn ku jiraan oo uu waliba asagoo wabiga la hadlaya oo odhanaya "wabigaagan ayaan la hadlayaa hadii aad ahayd mid usocda Alle dartii Hadda soco oo hajoogsan hadiise aad ahayd mid iskiisa usocda waligaa hasocon xiligaas laga bilaabo ilaa hadda wabiga niil wuu socdaa waliba kor ayay ukaceen biyihiisu''.cumar labo shay ayuu ku mutaystay awoodaas uu kula hadlay wabiga mida koowaad cumar Alle ayuu cilaaqo dhaba la lahaa midda labaadna waa kalsooni haa, kalsooni ayuu naftiisa ku qabay wuxuuna aaminay nimcooyinka alle uu siiyay.Hadaba ogoow kalsoonida naftaada kolba intay le'egtahay ayay farxadaaduna le'egtahay tilaabooyinkaan raac si aad kalsooni nafeed ugu noolaato naftaadana ugu abuudho kalsooni wayn

1. Badi cibaadada Allaah
2. Hadii aad horay ugu guulaysanwayday waxyaabo aad ku taami jidhay niyada gali adduunyadu waa kac iyo kuf ee ha niyad jabin.
3. Markaad rabto inaad go'aan gaadho ama aad qorshayaal cusub samayso haka tagin xaqiiqada iyo sida suurtogalkaa, mararka qaar waxaa niyad jab iyo kalsooni daro keena go'aano aan suurto gal ahayn oo aan gaarno.
4. Aamin naftaadu inay tahay mid kalsooni leh, kalsoonidu maahan waxay dadku kudhashaan naftuna ay la timaado waa wax ku xidhan xaaladaha qofka iyo doorarka uu matalayo xiligaas.

Ugu dambayn kalsoonida macnaheeda maahan dhamaystirnaansho mid walba oo inaga mida wuxuu leeyahay dhaliilo qofnaba ma dhamaystirna balse waxaa muhiima inaad naftaada kalsooni ku qabto waxaadna ogaataa inaad tahay ruux fariida oo wax-qabsan kara oo gaar ah dadkana wax badan kaga fiican kalsooni inaad naftaada ku qabto waxay kaa caawinasa inaad hormar gaadho ku kalsoonoow naftaada jecloow naftaada waxaa jira xaalado qofka noloshiisa kamida oo ay kalsoonidiisu kacsantahay sidoo kale waxaa jira xaalado ay hoos udhacayso kalsoonidiisa hadaba isku day inaad maamusho kalsooonida naftaada."AWOOD WAXAAD LAHAANASAA KOLKAAD NAFTAADA KALSOONI SIISO".

HAKA **QUUSAN** KALSOONIDAADA

Mar walba oo waddo kaa soo xidhmato macnaheedu maahan inaanay waddo kale kuu furmaynin, waddo kale dabcan way kuu furantahay waxayse kaaga baahantahay baarid iyo baadigoob.

Noqo biyaha oo kale biyuhu haddii ay dhagax kusoo beegmaan ayagoo socda dhinac ayay ka maraan haddii dhinacyaduna ka xidhanyihiin dusha ayay ka maraan si kale noloshu waa xeelad iyo caqli naftaada ka ogoow oo ka ilaali quusashada waayo quusashadu ayada ayaaba albaabada isku dayga xidha mar walba xusuusnoow noloshu haddii ay si noqon waydo si kale ayaa u waan-waana.

Mid ogoow:-

Wanaagu ma dhamaado, dambigana lama ilaawo, abaal mariyaha maalinta qiyaamana ma daalo, waxaad doonto samee waa lagugu samayn.

Ka digoooow, ka digtoonoowoo ka digtoonoow inaad ka saahido camalka wanaagsan iyo in aad shay walba ka quusato maxaa yeelay camalka wanaagsan waa sababta aad dunida u noogto dunida uma joogtid quus iyo niyad jab.

X. Aqoon yahan carbeed

CUTUBKA 7AAD

ISMUUJINTA ALLE AGTIISA NAF AHAAN.

Waxaa muhiima qofka bani'aadamkaa in naftiisa hormar cibaado gaarsiiyo si Alle (sw) uu agtiisa ooga muuqdo sharafna ooga yeesho waxaad isleedahay adduunka hadaadan caan ka ahayn dhanka Alle waxba maahan hadaba dhagayso qisadan " **AbuuDarAl-Qaffaari** wuxuu ahaa saxaabi aad usharaf badan dadkoo dhana aad umaysan aqoon waxaa dhacday maalin in uu nabiga (scw) uu uyimaado malag malaa'igta kamid ah wuxuuna ku yidhi muxamadoow waxaad salaam Alle kagaarsiisaa **Abuu Dar Al Qaffaari**Nabiga wuxuu yidhi waayahay balse ninka aad sheegayso dhulkaba lagama yaqaane xaga sare Malaga yaqaana malagii wuxuu yidhi saxaabigaas caalamka sare oo dhan baa laga yaqaana rasuulku (scw) wuxuu yidhi muxuu ku mutaystay heerkaas malagii wuxuu yidhi wuxuu ku mutaystay marwalba wuxuu aqriyaa suratul "**IKHLAAS**" bal eeg walaal abuu-dar intaas oo kaliya ayuu ku gaadhay heerkaas intaas le'eg muhiim ma ahan in adduunka lagaa yaqaan wax walbana aad haysato hantiilana aad tahay muhiimada dhabtaa waa Alle agtiisa wax makuu yaalaan magacna halkaas maku leedahay hadaad udadaasho inaad magac iyo maamuus kuyeelato adduunka ogoow waxaad daba ordaysaa shahwaadkii iyo qaflada nafta ugu dambayna waxaad ku noolaan ama ku dambayn hoog iyo halaag ,Garaadkaaga ku dhiiri gali inuu Alle agtiisa wax uun kafahmo halkaasna uu wax usii hormarsado waxwalba oo aad hormarsatana maalin ayay ku anfcayaan maalin ayaad u aayayasaa xaqiiqdii hadaad u dadaasho sidaad adduun ku hantiyi lahayd ogoow adduun wax lagaaro maahan waligaana mahantiyo doontid hadda kahor waxaa saaxiibo ahaa labo nin oo mid gaal yahay midna muslim yahay midka gaalka ah wuxuu ahaa nin Alle wax siiyay maal badana leh ,carruur badana dhalay sidoo kale wuxuu

lahaa beero waa wayn oo qudrado kasoo go'do kan kale oo muslimka ahna wax tacab ah ma uusan haysan carruur badana ma uusan dhalin wuxuu ahaa nin ninkaas wax ka qaata saaxiibkiisaas Alle unicmeeyay waase nicmo booskeedee aanan oolin waxaa jirta iyana ninkan gaalka ah wuxuu maalin walba ugu faani jiray maalkaas iyo ubudkaas wuxuu ku dhihi jiray ilaaha aad caabudid ma wuusan waxanoo kale kusiin karin mase heli karaa Allahaas, ninkii muslimka ahaa ee Alle (sw) iimaankiisa wayn ku mutaystay waxaasoo dhan waxba kama soo qaado mana niyad jabo rabigiis ayuu wax walba udhiibtay asagaa faqriga gashay asagaana kasaari kara waxaa dhacday maalin maalmaha kamid ah inuu uyeero saaxiiibkiis isagoo ukaxaystay beertiisii waynayd wuxuuna ku yidhi waxanoo nicmaa oo aad arkayso oo ay indhahaagu qabanayaan ma jidho cid iga qaadi kadha, ma jidho cid iga awood badan oo iga baabi'in karta hantidayda, mana jidho cid wax kabadali kadha waligeed sidaaas ayay ahaanasaaa war cid awoodaba ma jidho inay xoolahayga iga ag-fogayso xitaa ilaahaaga aad sheegayso ninkii muslimka ahaa wuxuu ku jawaabay rabi (sw)wax walba wuu awoodaa xoolahaana kuuma uusan siin inaad masaakiinta ku maadsato asagana ku tiraahdo igama qaadi karo awalba asagaa kusiiyay waxaa xaqiiqaa inuu isla-waqti xaadirkan kaa qaadi karo waliba si dag-dag ah oo aad umalaysanwaydo aadna la amakaagdo ninkii gaalkaa ahaa wuxuu ku jawaabay aan arko ilaaha aad sheegayso inuu bal wax kabadalo beertayda Alle (sw) waa mid maqlaya nimankaasi waxay kuwada sheekaysanayaan wuuna awoodaa inuu jawaab dag-daga kabixiyo balse maxaa dhacay ninkii gaalkaa ahaa markay afkiisa kasoo baxday aan arko inuu ilaahaagu beertayda baaba'sho ayaa waxaa beertii gudaheeda ka dhacay waqti yar gudihiis inay baaba'do gabi ahaanba oo ay saxaro camal noqoto, xitaa beertu waxay lahayd meelo dur-duro ah oo ay biyo kasoo qubtaan halkaas xitaa waxay uekaatay meel aysan waligeed biyo marin maranba, dhulkiina wuxuu u ekaaday dhul amasoore ah oo aan waligiis waxba lagu beerin iskadaa dhul beer

ahaan jiray in lamoodee xitaa wuxuu uekaaday dhul aanan waligiis waxba lagu beerin dhul beerashana aan ahayn si walba oo ay beertaasi uquruxbadnayd waxay la misaalo noqotay yacni u ekaatay dhul abaar ah oo aan beerasho ku haboonayn xitaa haduu isdhaho mar kale wax ku beero sidii hore oo kale maba ahan dhul wax beerashada ku haboon oo carro san ah,ninkii gaalkaahaa wuxuu ku walbahaaray tolaayeey meeday hantidaydii iyo beertaydii ***Tollaayeey***!! ***Tollaayeey***!!, Ma saanaa ii dambaysay ninkii muslimka ahaa ayaa u jawaaboo ku yidhi hadaad meel dhaw kasoo laaban kadhaa oo aad Alle rumayn kadhaa maxa yeelay wax walba si toosa ayaa laguu tusay hadda ulaabo rabigaaga saxda ah isaga ayaa ah Allaha mutaystay in la caabudo oo wuxuu kusiiy aan lagu takrifalin,

qisadan waxaan usoo qaadanay inaan isxasuusino adduun inaan waligiis lagaari Karin qisadan madhamaystirna sidoo kale qisadan qur'aanka ayaa lagu sheegay oo lagu xusay khaasatan suuratul-***kahfi***, hadaba maxay tahay fahanka qisadan, mida koowaad ilaahay (sw) cidda uu doono wax waa uu siiya cidda uu doonana waxba masiiyo ninkaas gaalka ah wax walba Rabbi (sw) waa uu siiyay ninkaas muslimka ah oo iimaanka leh hadana caabudayay isagoonan waxba siin ilaahayna waxba masiin aanan ka ahayn iimaan rasmiya waa sababta uu ugu waynaaday kan gaalka ah mida labaad muhiimadu maahan marwalba inaan fiirino waxa muuqda waxaa muhiima inaan fiirin waxa qarsoon iyo sababta loo qariyay ninka gaalka ah beertiisa, hantidiisa iyo ubudkiisa way muuqdaan oo waa wax la arki karo balse ninka muslimka ah wuxuu haystaa wax aanan la arkaynin hadana waxaasoo dhan kawayn waxaasina waa ***iimaanka***, iimaanka ayaa qof walba hormariya hadaad moodaysid dadku inay lacag iyo hanta hormariso hadaba qisadaas iyo ninkaas ku tusaalo qaado adduunkaana waxa dhibkiisa iyo shahwaadkiisa ka badbaadaya qof iimaan buuxa leh caqiidadiisuna sarayso iyo aaminaada Alle sw.

DARDAARAN:

“ Walaal adduunka waxaad kasoo qaadaa adoo dhex maraya xero ama wado qodxo yaalaan sidaad isaga ilaalinaso qodaxdaas inay kumudo isaga ilaali inay naari ku mudo Adduunka waxaa qodax looga dhigay naf iyo shaydaan iyo waxii macooda noqday’e masuuliyad iska saar sidaad naftaada Alle agtiisa magac iyo muxibo ugu yeeli lahayd ileen taasi waa liibaan Aakhira’e” “haah” waa liibaan aakhiro dhammaanteen.

CUTUBKA 8AAD

SHARKA IYO KHAYRKA NAFTA.

Nafta waxaa ushara wixii uxun waxaase ukhayra wixii uwanaagsan balse su'aasha iswaydiinta mudan ayaa ah, maxay yihiin waxa nafta sharka uhorseedaya iyo waxa khayrka uhorseedaya waana muhiim inaad su'aalahaas jawaabo kahaysato garanasana waxa naftaada dhibka ukeeni kara khayrkana ukeeni kara hadaba maxaa kamida waxyaabaha nafta sharka uhorseeda waxaa kamida labadan qodob ee ugu miisaanka wayn baynu soo qaadananaa

Qodobka koowaad:

1. ***Waqtiga firaaqada oo kugu bata***

Waqtiga badan oo bilaa camal la'aanta ah waxuu kamid yahay waxyaabaha qofka uhorseeda inuu falal xun ku dhaco qofku haduu iska dareemo camal la'aan ama shaqo la'aan waxay naftiisu ku amraysaa inuu sameeyo wax waqtiga uu isku dhaafiyo waloow ha ahaato wax waqtiga dhibaya naftana dhibaya , waqtigaaga inaad isku filnaysiiso waxay kaa caawinasaa inaadan dambiyo ku dhicin iyo falal khasaaro kuu horseedaya dhalinyaradu mashquulka aad ayuu ugu fiicanyahay intaad waqtigaaga gidaarada ku lumin lahayd waxaa kuu dhaantaa adoo waqtigaaga kaga faa'idaysta kutub akhrintiis iyo samaynta camal wanaagsan ama daalacashada khayrka iyo daraasaynta cilmiga.

Qodobka labaad:

2. ***Wax barasho la'aan***

Qofku haduusan waxbaran waxay naftiisu ku marin habaabinasaa jid khalan kadibna waxaad ku dhacaysaa dambi nafta inaad mashquuliso waa wax fiican hadayse firaaqo kaa dareento waxaa khasaba inay naf iyo shaydaan kusoo weerarayaan kugunalana talinayaan inaad wax khaldan samaysid.

Dhalinyarada waxaa loo baahanyahay inay noqdaan dad camaliyad leh oo mashquula hadaad enerjigaaga isticmaasho waxa xunba waad ilaawasaa hadiiise enerjigu kugu kaydsamo maantoo dhana aad sheekaynaysay cunana aad ka dharagtay nafta waxay kuu sawirasaa sawiro khaldan iyo khiyaal caalam kalaa riyadaa kugu badansalaakiin waxaaso dhan waxay kaaga imansaa camal la'idda, qofka sidii neefkii wax cunaya waxna cabaya beerkana ujiifa waxaad ubaahantahay inaad waxbartato inaad shaqo samaysato inaad wax akhrisato inaad jimicsato kaliyata nafta udiid camal li'ida enerjigaaga isticmaal hadaadse enerjigaaga isticmali wayda oo uu kugu kaydsamo naftaada ayaa ernerji kuu noqonasa yacnii inay ayadu ku isticmaasho oo dhanka khaldan kuu isticmaasho , firaaqa kabax firaaqo wuxuu dilaa nafsada qof cimrigiisii wuxuu ku qabto garanwaayay waa ceeb cimrigu waa nicmo allah kusiiyay hadaadba garanwaydo nicmadaas halkaad uisticmaasho oo aad tiraahdo maxaynu waqtiga ku dilnaa waa ceeb Firaaqu kolkuu kugu tiro bato oo cunadu kugu tiro badato oo waxbarasho la'aanina jidho hadaba waxaa tahay qof khatar kusugan.

Hadaba intaasi waa intii nafta uxumayda maxaa nafta ukhayra marka nafta waxaa ukhayra,

1 .in waqtigeeda lagu maamulo
2 . in la qiimeeyo
3 . in miisaaniyada camaliyeed latuso
4 . in jidka khayrka lagu weeciyo
5 . in lakobciyo

6 . in Allahii abuurtay lagu xidho

7 . in mar walb laxasuusiyo geerida iyo Aakhiro

.

CUTUBKA 9AAD;

NAFTAADA JECLOOW

Naftaada inaad jeclaato waa waxa ugu qiimaha badan ee aad naftaada uqaban kadho kadib markaad naftaada jeclaato waxaa si rasmi ah ugu xidhmaysaa nolosha saxdaa kalsooni nafeed oo aad uwayna waad haleysaa.

marar badan adigaa iswaaya inta aad ku jirto raad-raaca cid kale waxaa kugu adag inaad “HAA” ku tiraahdo naftaada waxaa kaaga fudud in aad meel mariso ta,dadka waxaad ka cago jiidaa inaad ujeedadaada unoolaato sidoo kale way kugu hungoowday naftaadu oo way isruugasaa oo cidhiidhi iyo madhnaansho ayay gudaheeda ka dareemaysaa waayo isma lihid , dadka kalase way kugu badhaadheen oo dan bay kugu qabaaan markaad kali iskula sheekaysanaso waad garawsataa arintaas waadse iska indho tidhaa waa su’aale yaad unooshahay marka? Dadka mise naftaada?

Uma jeedo inaad noqoto bakhayl gacantii go’day ah oo aan wax wanaag ah laga dheefin waxaan ula jeedaa waaxanad adigu haysan cidna masiin kadhid, ha dhamaato noloshan aad adigu ka qatantahay !!, Waa xiligii aad dib uahantiyi lahayd masuuliyada noloshaada, waa xiligii aad adigu dib isku heli lahayd ee aad adigu isyeelan-lahayd waa xiligii aad kaci lahayd naftaadana aad usheegi lahayd inay taagantahay waqtigeedii, bur-burtaye dib isku ururi oo isjecloow haddaad isjeceshahayna isku sheego ha isku sheegan uune af iyo adinba iskugu muuji waa markaagii istaag hadda oo naftaada jecloow oo isku sheego jacaylka aad uqabto naftaatada.

Naftaada inay cid kale jeclaato way usahlantahay, inay cid kale ka hesho way usahlantahay waliba inay usheegato way usii sahlantahay maxaa udiiday inaad adigu qudhaada jeclaato waa su'aale?

Cidda isku diidan inay isjeclaato waa isla adiga, naftaada usheego jacaylkaaga markaas waxaa ogaanasaa jacaylka naftaada aad jeceshahay inuu aad uquruxbadanyahay cid lajeclaadan ay ugu qurux badantahay haah aad ayay uqurx badantahay jacaylka naftaada, hormar ayaad ku gaarasaa jacaylka naftaada, naftaada oo aad kalsooni wayn ku abuudho ayaa ah jacaylka dhabtaa ee naftaada.

OGOOW; dadka qaar kuguma imaanayaan inay ku jeclaadaan ee waxay kuugu imaanayaan si ay kuu isticmaalaan sidoo kale uma imaadaan inay nolol kuu keenaan ee waxay uimadaan sidii ay kaaga qaadi lahaayeen noloshaadii saxda ahayd , kuuma arkayaan qof ahaan waxay kuu arkayaan fursad ahaan kuwaasina waa dadka aan kujeclayn adiga ahaan waxay kugu jecelyihiin waxay adiga kaa qaadanayaan kuumana ahan daacad ee waxay daacad uyihiin faa'iidada ay adiga kaa helayaan taasina waa sababta ay waligood garabkaaga u ahayn halka aad adigu inta jeer aad garab siisay ay badantahay ,in sidaas lagaaga faa'idaystana waxaa masuul ka ah adiga waayo maxaaa yeelay naftaada kalsooni kumaadana abuudhin mana aadan jeclaan waxna ma aanad meel sii dhigan waxayna intaas kuu noqonasaa wado adiga laguu soo maro oo fursad istcimaal ah aadna dadka unoqoto fursad faa'iido hadaba ka digtoonoow taas oo si habsami leh ujecloow naftaada jacaylka nafta waxaa ku ladhan liibaantaadee "haah" liibaanteena ayaa ku ladhan walaal.

"Noloshu dadka qaar way xumysaa kuwana way wanaajisaa macnaheeduna maahan in noloshu keensatay xumaanta iyo wanaaga ee waa waxaad adigu latimaaday oo samaysay noloshuna way kuu fulisay waxaad latimidey kuu ahaaba xumaan iyo wanaag hadaba

doorashadaada wanaaji si aydaan nolosha isugu dhicin yacnii kataxadar waxaad nolosha udhiibanaso si laguugu fuliyo".

Hadii aan ku macneeyo jacaylka nafta malab weeye lamilicsado muunadna asagaa kuugu filan iyo eray macnihiise, mu'min inaad ahaantana waxaa ka koow ah naftaada oo aad ku ababiso jacaylka Alle sw.

Kolkaad naftaada jeclaato oo aad ixtiraamto ayaad dadka kale ka helaysaa jacayl iyo ixtiraam, kolkaad naftaada waynayso ayay dadka kala kuwaynaynayaa adigay markaasi xilkaaga tahay inaad naftaada kalsooni jacayl ku beedho.

Taladu waxay tahay kacoo wixii kula gudboon ku dhaqaaq ileen fulaynimo himiladaada ku gaarsiinmayseehadaad iska ahaato waliga qof fadhiid ah yacni iska fadhiya fursad walbana ay dhaafto shalaytadaaduna ay badato waxaad ku dambaynaysaa hormar la'aan iyo nolol bilaaa dhadhan ah.

"Samayso liis ka kooban wax Alaale iyo waxay naftaadu necebtahay iyo wax Alaale iyo waxay naftaadu jeeshahay."

Waxay naftaadu necebtahay iyo waxay naftaadu jeceshahay oo aad garan waydo macnaheedu waa cimrigaaga oodhan inaad unoolaato sidii bac dul hee-haabasa bada ama hadba hirarka iyo dabayluhuna dhinac utuuraan iyo dameeri dhaan raacday oo kale , taas oo ku tusinaysa inaad kunoolaato booraan iyo nolol aad kaqoomamayso sideedaba qof ogaal uyeelanwaayay naftiisan yartaa oo garanwaayay waxay uhungoowda iyo waxaysan uhungoobinba waa qof waxaan dhihi karnaa kalsooni nafeed waayay, hadaba waxaa raacasaa dadka jacaylkooda iyo fikradaha ka helitaankooda ah ileen maba ogid naftaadii ismana lihide heer waxaad gaarasaa aad dadka jacaylkooda xitaa ku beeldaraysato ileen meel kuma gaarasid qof ra'yigiisa inaad kusocotee waana wax dhaw inay soo afjarmaan waxa aanan kaa

dhamaanayn waa fikirkaaga iyo jacaylka naftaada, naf aad jeclaatay ayaa waxaa kasoo maaxda fikrado jihayn kara umad dhan isku day inaad naftaada ka ogaato halkay ku fiicantahay iyo halkay kuxuntahay waxaa jirta naftu meelo ay dhibsato inay isdul-taagto macnaheeduna waa inay naftaadu halkaas jeclayn umana abuurna qaabka ah inay tagto halkaas , naftaadu inay meelahaaso dhan ku qaldanto adiga ayaa ka hortagi kara oo waxaad ooga hortagi kadhaa inaad horayba usii ogaato jacaylkaaga iyo nacaybkaaga,Tusaale: jacaylku waa wax kadhexeeya basharka labada dhinac hadaad nafsadaada ku aaminto qof aysan jeclayn kolkiisii horaba dabadeedna meesha ay timaado dhimasho jacayl ogoowna jacayl looma dhintee waxaa loo dhintaa quusasho iyo nafta oo rajo dhigta kataxadar naftaada inay kaqoomamayso waxay ogaal ulahayn.

Kolkaan kuleeyahay liis samayso oo ku xardho waxad necbayd iyo waxad jeclaydba, liiskaas ayaa kafiirinasaa arin walba inay kamid tahay kuwo aad necebtahay iyo kuwo aad jeceshay oo aad kufiicantahay, naftaada uyeel ogaal ay ku kala ogaato arimaha doorashada.

Waxaan rajaynayaa inaad cutubkaan ka heshay qodobadii aad naftaada ku jeclaan lahayd ama ku hanan lahayd ileen badankeena waxaa ilbidhiqsiyo gudahood inagu badala hadalada dadka iyo odhaah qof yiri, sababtuna waa naftaada ayaadan lahayn inaad ka jeesatana waa ay kuu fududahay aakhirkana inaad gasho albaab ay kasoo galayaan xumaano dhan iyo fusqi.

CIDNA YAYSAN KUGU XUKUMIN JACAYLKA NAFTAADA

Daqiiqad walba waxaa is badalaya fikirkaaga, waxaa badanaya aamuskaaga, waxaa badanaya raadinta cilmiga kaa maqan.

Waxaadna iska indho tiri doontaa fikradaha ay ka qabaan jacaylka naftaada ee dadka dhammaan sababtoo ah muhiim kuuma ahan marka ugu horeeya ee aad aragto ama aad dareentid qof doonaya inuu khiyaameeyo naftaada waad is moogaysiin doontaa waliba adigoo ka digtoon, naftaada hadaad jeclaato waxay si saxa kuu bari doontaa adigoo og qof kuu sheekaynaya inuu naftaada been ka sheegayo inaad udhoolo–caddaysid si uusan qalbigiisu udhaawacmin.

Waxaad iska yaraynaysaa dadka tirada badan kuwaasoo aan naftaada kusoo kor dhinayn waxba, wax walba oo idil waxaad kaga dhawaanasa ilaahay sababtoo ah waxaad ogaanasaa inay liibaantu halkaa taalo.

Hadaba ogsoonoow intaasiba waxay dhici doonaan markii aad ogaal uyeelatid naftaada qiimaheeda lana timaadid jacayl nafeed oo qoto dheer oo sita ficil iyo ka dhabayn adag markii aad dadka qaar nacdid ra'yi-yadooda, markii aad naftaada bartid inay isku filantahay, markii aad waajahdid caqabad kasta oo adag oo aad bur-burisid kana adkaatid , markii aad ka maarantid ubaah-naanta dadka oo aad adigu noqotid mid madax banaan oo qorsheeya noloshiisa markaas ayay noloshaadu ka xoroobi doonta ihaanaysiga basharka aadna ayaga unoqon doontaa xidig ifiya dushooda kuuna akin doonaan qof muhiim ah kuguna tashan doonaan naftaadana aad uhorseedi doontaa xaqiijinta guulo mug wayn.

Markaas ayaad noqon doontaa ruuxii aad doonaysay adigu;

KA ADKOOW NAFTAADA KUNA TASHO NAFTAADA.

Awooodda dhabta ahi waa midda kuu saamaxda inaad naftaada ka adkaato.

Waxaa in badan ina dhiba ku tasho la'aanta nafta waxaa jirta intaad naftaada ku tashanayso inaad in kabadan ku tashanayso dad kakle taasina waxay kuu horseedaysaa dhaawac iyo madhnaansho nafeed oo sidee kuu badasaa dhaawac iyo madhnaansho nafeed?.

Marar badan waxaad soo martay kalinimo iyo diiqado xun oo noloshaada aan awaqtigaas ku haboonayn, marar badan waad kuftay laakiin waxaad wayday cid gacanta ku qabata oo ku garab istaagta, marar badan waxaad rajaynaysa inaad haysato dad kusiin doona caawimaad iyo garab istaag badan laakiin maad helin, marar badan waxaad wayday guushaada cid kuugu hambalyaysaa oo qasdigeed wax uun ka sheegta si ay guushaadu ubadato laakiin maad helin, marar badan waxaad filanaysay oo aad cid kale ka malaysanaysay in laguu istaago meelo aad adigu filatay laakin cidna ma istaagin, Ma waanay sax ahayn marka inaad ku dhaawacantay filasho iyo tashi aad ka qaadatay cid kale **HAA** waxaa ku dhaawacday filashadaadii sababtuna waa inaad adigu in kabadan intaad naftaada wax ka filato ka filatay dad kale sidaas ayay filashadaadu kuu dishay.

Waxa ugu muhiimsan ee ugu quruxda badan waa inaad naftaada ka filato waxa ugu wayn ee aad ka filan karto qof kale, inaad naftaada ka filato in kadan iyo wax kastood aad ka filan karto dad kale.

Waxaad ogaataa wax walba oo la qabanayo, wax kasta oo kugu saabsan iyo wax kasta oo aad ubaahantahay hawlagalintiisa iyo cududiiisa waa inaad la haato adigu.

Si aad qorshe walba oo naf ahaantaad ah aad hawl galintiisa u lahaato waa inaad adigu isku tahstaa oo adigu is jeclaataa oo aad adigu adiga ahaataa si aad adigu adiga u ahaato waligaa, kaydka ugu wayn ee aad nolosha ku haysato waa adiga dhaqaalee kaydkaaga si aad u hesho kalsnooni nafeed, jacayl nafeed iyo guulo wax ku oola si kaydkaasu kuu bad-baadiyo adiguna kaydkaas baa tahay nolosha rajo iyo riyo ka lahoow riyadaasna dabo orod.

Mararka qaar waa inaad dhabarka ujeedisaa dadka qaar iyo kuwa isku daya inay liidaan naftaada taas macnaheedu maahan inaad kibir badantahay oo aad isla wayntahay balse waa caafimaadkaaga iyo daganaanshiyahaaga dartiis.

Waxaa tahay ruux wax walba awooda dunidana raad kaga tagi kara laakiin halka mid oo kaa maqan ayaa waxay tahay socdaal ogoow guushu rajooyin iyo go'aano oo kaliya maah ee waa socdaal iyo dhaqaaq biyaha markay meel fadhiistaan oo ku raagaan way qudhmaan kadibna way soo uraan balse biyaha wabiga iyagoo in badan ku jira halkooda ma uraan mana qudhmaan sababtoo ah waa socdaalka hadaad iska fadhido waad qudhmaysaa kadibna dadkaad usoo uraysaa, guushu waa socdaal iyo inaad kortid buuraha iyo meelaha risk-ga ah si aad u ogaato shaqsiyadaada dhabtaa, naftaada ku weelee subax walba waxaan ahay ruux wax walba awooda aniga ayaa dadka ugu sareeya, noloshayda mulkigeeda aniga ayaa leh hubaal haddii aad naftaada inta san aad ku bar-baariso ilaahayna aad talo saarato waxaa xaqiiqaa inaadan hubgoobayn nolosha waxa la isku dhaafay waa rajada san haddaad is leedahay armad fashilantaa armaad ceebawdaa armay dadku ku cambaareeyaan intay erayadaas maskaxdaada ku jiraan waligaa guulaysan maysid.

Wax walba waxay qiimo ku yeeshaan sida aad uqabato iyo halka aad ka raadiso, nolosha ma jiraan wax qiimo ku fadhiya illaa aad waxaas khatar ugasho mooyee, Han sare iyo guulo wax ku oola laguma gaaro

inaad meel hoose iska joogto kuna qanacdo nolol ka hoosaysa mid aad awoodeeda leedahay isku day inaad ogaaato inaad khibrad uleedahay inaad wax ikhtiraacdo.

Waxay ku leeyihiin qof ku tiirsanoow intaadan guul gaarin ama inta aad guusha ku raad jidho balse maalinka aad guul daraysato waxay ku leeyihiin hanagu tiirsanaan, adiga ahaan cidna ha isku halayn cidnana ha aamin markaan ku leeyahay cidna ha aaminin kamawado inay kugu yaraato kalsoonida iyo aaminaada dadka kuu dhaw ee macnahaygu waxaa weeye badanaa indhahaagu ha furnaadaan ileen waqtigu kuuma sheegayo xilliga dhaawacu kugu dhacayo balse xanuunka ayaa ku dareensiinaya in dad kuu dhaw ay ku khiyaameen lahoow garaad iyo kalsooni aad ku aaminto dadka oo aad ku garato kan saaxiibkaa ah iyo kan cadawgaaga ah, badanaaa waxaynu nafaheena ku qancinaa la saaxiibida qof, qofkaasoo in badan ka carara saaxibitinimadaada dhibna u arka hadalkaaga iyo lajoogaaga ka digtoonoow dadka noocaas ah waxaan kaaga digayaa inaad qof garabkaaga ubaahnaa aad ka tagto gacantana aad sii haysato qof doonaya inuu kaa tago.

CUTUBKA 10AAD

HIMILADA IYO HANASHADA NAFTA

Himilo marka laga hadlaayo waa waxa qofku ku fekero ama uu ku hamiyo inuu fuliyo ama uu xaqiijiyo inta uu noolyahay sidoo kale waa waxa laabta qofka kusoo noq noqda oo uu qofku haduu waxaas hanto uu noqdo qof nolosha ku guulaystay, himilo w aa waxa kolka aad gaadho aad dareemayso guul, qanacsanaan iyo in aadan naftaada dayicin noloshana aad tahay qof wax ku'oola.

Waa wax wanaagsan inaad naftaada hanataa oo aaad himilo uyeeshaa.Waxaan su'aalay dad badan himilo waxay tahay waxaana iisoo baxday in erayga himilo isku si' loo yaqaan hadana qof walba uu leeyahay himilo iyo hiigsi ugaara dhawr qof ayaan waxaan su'aalay maxay tahay himiladiinu waxayna yidhaahdeen

- ✓ *in aan cibaadadayda badiyo, ilaahayna caabudo*
- ✓ *in aan marwalba xusuusnaado geerida iyo maalinka qiyaamo*
- ✓ *in aan dadka kasareeyo oo dayaxa iyo duruuraha aan dago*

Eeg hadaba sida himilooyinka dadkaasi ay ukala baahsanyihiin, waa maxay adiga himiladaadu? Maku fakadhay wax adiga kuu gaara dadna kaa sara marinkara mise kufakadhay inaad tahay qof wax walba awood uleh inuu qabsado himaladiisuna tahay tan dadka ugu saraysa hadii aadan hada kufakarin waxaa lahubaa inay jiraan waxyaabo laabtaada kusoo noq noqda oo aad jeceshahay ama aad gaarto maxay yihiin marka?.

Hadii aadan garanayn waxaad rabto , iswaydii maxaadan rabin oo aad rabtaa inaad kabadbaado ?Aaway wiilkii yaraa oo rabay inuu nqodo digtoor,baylood,injineer,caalim diinta islaamka bartay makaanik,

aqoon yahay, aabe dhala ubad dadkiisa iyo diintiisa dhawra, Aawey Iyana gabadhii rabtay inay noqoto digtoorayso, kalkaaliso, duuliso, macalimad, hooyo soo saarta ubad haysta diinta islaamka lehna akhlaaq wanaagsan oo difaaca diintooda iyo dadkooda iwm?.

Ma waxaad umalaysaa in hadii lawaynaado inay himaladaadi lumayso mise adigaa kaharayaba inaad hiigsato heerkaaga isaseejiyayna hankaaga?.

Ogoow midkastaba himiladaadii waa ay nooshahay ilaa iyo hadda wayna jirtaa ee adiga ayaa lagaa rabaa in aad aqoonsato, boodhkana iska jafto kuna dhaqaaqdo hiigsashadaadii iyo himiladaadii hore.

Hadii aad rabto inaad fuusho buur dheer fiinteeda ogoow kuu suurtoobimayso adiga oo aan iska daadin culayskii aad horay usidatay waa fekerka iyo ficilada aad hubto inaadan fiinta buurta kufuuli Karin, markaas kadib waa inaad dhididaa muruq iyo maskaxba mudnaantana aad siisa ishana kuhaysaa buurta fiinteeda si aad ufuusho ileen ayadaa ah himiladaadee waxaa muhiim ah inaad kafeejignaato waxa dadka badankiisa udiida in ay ku dhiiradaan himiladooda dadku marka ay gartaan waxa laabtooda kujira oo ay jecelyihiin kuna hamiyaan inay gaaraan ayay islamarkaaba iswaydiiyaan su'aasha ah : *sidee ku gaadhi kadhaa himiladayda?.*

Waxa aan ku xasuusinayaa in su'aasha ah sidee ku gaadhi karaa himiladayda ay kamuhiimsantahay su'aasha ah *maxay tahay sababta aan urabo in aan u gaaro himiladayda?,*

Labadan su'aalood oo macnahoodu yahay sideen wax usameeya, iyo maxaan waxaan usamaynayaa marka hore ka jawaab maxaan waxan usamanayaa?.

Ayada ayaa bilaabasaa sidii aad wax ugu fekeri lahayd sidee wax usameeyaa hadaba "**maxaan**" ayaa kahoraysa "**sidee**" xaqiiqdii marka aad garato himilaadaada kana jawaabto su'aasha ah maxaan

himiladayda u hiigsadaa ayay maskaxdaadu bilaabasaa inay lafo-gurto sidee himiladayda ugaaraa?.

Dr.Tony campola ayaa sheegay daraasad laga sameeyay **50** qof oo waayeel ah rag iyo dumarna isugu jira ayna sameeyeen dad aqoonyahano ah, wuxuuna sheegay in waayeel kaas lawaydiiyay su'aal ah "*hadii noloshaada dib loo celin lahaa maxaad ka badali lahayd"? {if you had it to do over again what would you do differently}?* Su'aashu waxay ahayd mid furan oo jawaabahooda kala duwanaan karaan hasayeeshee jawaabaha waayeelku kabixiyeen waxay noqdeen kuwo isku wada mida waxayna kujawaabeen sidan.

1. Waan fakari lahaa oo naftayda ayaan qiimayn kusamayn lahaa
2. Sidii hore si kaduwan ayaan himiladaydi uraadinlahaa
3. Waxaan ifka kaga tagi lahaa himila latiigsado.

Waayeelkaasi waxay dhamaantood kashalaayayaan yaraantoodii sidii ay habfikirkoodi u isticmaaleen himiladoodana usaxi lahaayeen waase waxaan suuroobayn inay dib ulaabtaan oo gadaal loosoo celiyo waxayna isku raaceen "*waan fakari lahayn*" oo macnaheedu yahay tallaabo kasta oo aan qaadayo waxaan kadhigi lahaa mid ii jihaysa himiladayda iyo hiigsigaan unoolahay , waxa nolosha macnaha uyeelaya waa habfikirkaaga iyo waxay himiladaadu ku salaysantahay cutubkan waxaan ku gorfaynay qodobka kusaabsan himilada waxaynu arki doonaa in qof waliba nolosha uu noolyahay aysan kafogayn sida uu ufakaraayo waayo "*ninna maankiisa masaluugo*" dadkeenaa dhalinyarada ah waxaynu kusifoobnaa maah-maahda tibaaxda "***labaatan jir intuu geed kaboodo ayuu talo ka boodaaa***" inta badan dhag jalaq uma siino talooyinka fiicana ee ku haboon jiritaanka himiladeena ma aynaanu fahmi jirin waase wax kolkaan waynaano dhib inagu keeni kara sida waayeelkaas, islawaqtigaan aan dib ugorfayno fakarka iyo himilo saraysa.

"*hubi in fakarkaagu kuu jihaynayo sidii aad ku gaari lahayd himiladaada".*

Maskaxdu waa mashiin maalintiiba ay kasoo baxaan fakrado kala gadisan oo aan tiro lahayn qaar waa kuwo ku oranaya himiladaada magaari kadhid qaar kalana waa kuwo ku oranaya himiladaada waad gaari kadhaa fikradahaan aan guud ahaan ukala qaadi karno **samo-sheeg** iyo **xuma-sheeg** ayaa ku hardamaaya maankaaga waxaana guulaysanaya tii aad si fiican udhagaysato una bar-baariso , tusaale waxaa tahay qof muddo shaqaynayay xoogaa lacag ahna aruursaday oo uu ganacsi kusamayn karo waxaad ku haminaysay inaad hantidaas maalgashato si ay kuugu shaqayso fekerka ah samasheeg wuxuu ku oronayaa hawshaas qabo oo ku dhaqaaq wuxuuna ku tusayaa adigoo ganacsigaas ku guulaysatay hormarna kasameeyay ganacsiga xitaa wuxuu ku odhanayaa hadii aad ganacsigaas ku fashilanto waxaad ka dhaxlaysaa waayo aragnimo iyo khibrad aad u aaydo , xumasheeguna wuxuu ku odhanayaa ganacsi waxba kama garanaside amaad qasaartaa oo xoogaagii kuu guntanaa ay kaa furantaa wuxuu ku tusayaa khatar wayn oo ah adiga oo waxaad cimrigaagii oo dhan aruurinaysay ay ku dhaafto si dhakhsaa iyo inay dadku ku arkaan adigoo fashilmay ogoowna inta aad nooshahay waxa horusocod kuu keeni kara ama dib udhac kuu keeni karaa waa fakarkaaga iyo sidaad ufakadho waxaa layidhaahdaa waalida waxaa lagu macneeyaa,*waa qof samaynaya wixii uu samaynjiray una samaynaya sidii uu usamayn jiray isagoo sugaya oo rajaynaya in natiijo ama maxsuul kii hore kaduwan kasoo baxo.*

Nolosha waxa macnaha uyeelay waa hansare iyo himilo toosan hadaadan nolosha hiigsi iyo himilo ka lahayn waxaa kaa maqan macnaha nolosha ileen qof walba wuxuu unoolyahay inuu meel hiigsado'e gaarana halkuu ku taamayay.

HANKA SARE :

Wax walba waad gaari kadhaa haddii saddex lagaa helo:

i Markaynu ina yar fiirino hanka sare iyo halkuu dadka ukala jooga, kolkaynu in yar milicsano taariikhda dadkii hore waxaad moodasaa inaynu dhex jibaaxaynu kawkab kale iyo caalam aynaanu aqoon ulahayn , dad aanan dhulkan aynu daganahay aan daganayn ayaad moodasa markaad aragto awooda ,juhdiga iyo tamartay bixinayeen waxay yaqaaneen iyo waxay qaybsanaayeen marka lagu yiraahdo waa caalim muslimoo fulaana ama marka lagu yiraahdo waa **BUKHAARI** ama waa **IMAMU AXMAD** ama waa **AWZACI**, nin walba wuxuu hayay boqolaal xadiisa oo xataa sanadkooda wata hadana uusan kitaabka ku qornayne woxoo dhanba wuxuu ku watay maskaxdiisa waa dad istcimaalay awoodii ilaahay siiyay ogoow nagama awood badnayd nagamana maskax waynayn nagamana dhaqaalo badnayn waloow aynu anagu ka dhaqaale badanahay waqtigaan lajoogo,

innaga awoodeenii iyo kartideenii xagay ka baxday waxaan rabaa mindaarka ama microscope-ka aan nolosha ku eegano inaynu badalno oo badal ku samayno raadinta iyo baadi-goobka nolosha saxdaa, muraayadaynu xidhanahay aad uqallafsan muraayadahaasi waxay suurto galin-waayeen inaynu aragno noloshii saxda ahayd taasi waxay keentay marka inaynu awoodeenii iyo kartideenii ay cadilanto oo waxba aynu garan kari wayno, taasaa waxay keentay in maalinba maalin inoo dhiibto shaqo walba oo aynu qaban karno aan niraahno bari ama sanadka dambe kadib markaan firaaqo noqdo, ogoow noloshanba mar la firaaqoobo maba jidho .

Cilmi idin ku kordhin maayo balse waxaan xaqiiqsanahay oo rumaysanahay in awoodeenii ay cadilantay, waayo shayga ay noloshu

ubaahantahay waa inaad wax'uun ka isticmaasho awoodaada oo aad firaaqa badan ka reebto.

Wax kasta oo aynu ubaahanahay, hadaf kasta oo aynu rabno inaan raadicayno oo xaqiijino wuxuu ubaahanyahay saddex shay waana.

1. **Han sare oo go'aan adag wata**: qofku inuu han-waynaado waa muhiim hadaad hanyartahay col hortii baad jabaysaa, hadaad han yartahay macnaheedu waxa weeyaan adoon waxba isku dayin ayaad jabaysaa laakiin qofku markuu han wayn yahay casiimo adagna leeyahay macquul waxaa ah inaad guushaada dhadhamiso marka lahoow han sare kaliya han ha lahaanine go'aan adagna ku darso.
2. **Awood iyo istidaaco inay jidho**: awood iyo qabasho inay jidho ayuu tilmaamayaa qodobkani ,awoodina way kaa buuxdaaye waa lagu tusi waayay soomaalidu waxay yidhaahdaan geelaba waxaa xoogiisa latusayaa aakhiro waxaan ka baqayaa inteena badani inaynu ku dhacno oo aragno aakhiro awoodii iyo nicmadii ilaahay nasiiyay oo aan adduunka arki kari waynay inayno kol kale aragno oo aysan waxba inoo tarayn xiligaas muraayadaha aynu xidhanahay ayaa awoodaas iyo fidradaas ina tusi waayay bal hal mar istaagoo buurta korkeeda fiidhi.

3. **In la helo dad fiican oo aad gargaarsato oo aad raacdid** dad aan aan musbidiin ahaynoo dad dhulka kugu nabayee aysan ahaynoo ay yihiin dad kor kuu qaadaya oo mar walba kor kaa yeelaya,

Waxaa macquula qofku haduu sadexdaas hab raaco inuu hadafkiisa raadintiisa uu si hab-sami leh ku haleelayo waxaan dhalinyarada usheegayaa war wax waad qabsan kadhaane wax qabsada oo awoodiina iyo istidaacadiina istcimaala kuna raaxaysta waxqabadka naftiina.

qofkastana qiimihiisu wuxuu yahay himadiisa, hankiisa iyo halkuu hiigsanayo ma jidho ceeb kawayn qof wax awooda hadana wixii hagranaya, qof wixii awooda hadana aan samayn karayn qolodan wax taxliilisa waxay yidhaahdeen hanka iyo himada waxaa loo qaybiyaa labo qaybood mid waa loo dhashaa oo waa mid rabbaani ah qof kasta oo bani'aadam ahna nooc himada kamida ah wuu ku dhashaa, midna waa la isku tarbiyeeyaayoo waa la isbaraa si loo helo ahdaafta nolosha waa labadaas un himadu.

Bani'aadamku waxay ku kala gadisanyahay labo shay oo ah

1. Hadafka: basharku wuu ku kala gadisanyahay yoolka iyo halkuu raadicaynayo, Nin janno doonaya oo hadafkiisu yahay booska ugu wayn ee jannada iyo nin kursi iyo madaxtinimo doonaya labadaas shaqsi ma isku yool bay raadicaynayaan waa maya isku hadaf ma ahan waxay kaloo ku kala duwanyihiin bani'aadamku.

2. Hanka gaarsiinaya meeshaas macnnuhu waxa weeyaan waxaa jira dad han iska haya oo riyo un uhaysta maba dhaqaaqo waxbana ma qabto waa qolodaan ay yiraahdaan socodkay ku riyoodaan dadka qaar kolkay seexdaan bay riyoodaan kolna waa kuwa socodka ku riyooda ,qof waxaa jira madaahib waa wayn ku haminaya laakiin dhaqankiisu iyo socodkiisu aanu ahayn kuwo ahdaaftiisa gaarsiinaya dadka qaarna waxaa wada socda halkay ku haminayaan iyo hab socodkoodu waana dadka si sareeca ku gaara kobtay rabeen qofka leh hammi baan leeyahay laakiin ficil ahaan aanu ka muuqan kaasi waan mid la kadiyay, dunidan waxay yidhaahdaan waa loolan, soo jeed iyo rag iska dhicin.

basharku aqsaam afaray uqaybsamaan kooxda ugu saraysa waa **ANBIYADA** kooxda ku xigtana waa kooxda casiimada adag leh.

kooxda kalana waa kooxda ahdaaf sare leh laakiin aanan lahayn himmadii iyo go'aankii, kooxda afaraadna waa koox aanan lahayn casiimo iyo ahdaaf waa kuwa ay soomaalidu tiraahdo lama tirsado lamana tabo.

Waxaan kusoo afmeeraynaa qofka himada sare leh, meelaan camalkiisu gaadhin buu xataa ku gaadhsiin kadhaa maalinka aakhiro nabiguna waa tuu lahaa ninka wanaag ku hamiya xittaa hadaanu qaban ilaahay wuxuu uqoraa wanaag dhamaystian.

CUTUBKII 11AAD

GEERIDA IYO NAFTA

Waa mid aad ugaaban in lagu noolaado niyad jab iyo mooraal xumo sidoo kale waa mid aad ugaaban inaad lahalgamaayso naftaada kana fikirto noloshaada , maalin ayaa loo qoondeeyay inuu qof walba dhimanaayo taasina waa qorshaha iyo mas'uuliyada Alle waxbana kama badali karno balse dhamaanteen waxaa inagu waajiba inaan marwalba kawarhayno dhimashada xusuusnaataana geerida si aad unoqotaan kuwo liibaanay wadkuna uyimaado ayagoo qalbiga ku haya inay marwalba dhiman karaan waxaynu waxyar sharaxaad kabixinanaa macnaha geeri ama mawd ama dhimasho ama sakaraad hadba sidaad utaqaanid.

Dr:Mustafa kamaal maxamuud,wuxuu ahaa faylasoof muslim ah masaari ah, wax badana kusoo kordhiyay caalamkan haday noqoto fikir guud iyo farsamo cusub sidoo kale wuxuu wax kabadalay hab fikirka dhalinyarada buugaag badana waa uu qoray muuqaalo badan waa uu katagay halakana wuxuu inoogu cadaynayaa micnaha mawdka isagoo ka qoray buug layidhaahdo "*HAL XIRAALAHA* ***MAWDKA***" waa buug carabi ah oo kuqoran afka carabiga dr;ku meelo badan ayuu wax ka fiirinayaa waxaana wax kafahmi kara qof lasocda halkuu tallaabada dhigaayo fahana uleh erayada ubaahan turxaan bixinta badan hadaba waxbadan ka ogoow waxa noloshan macnaha uyeelaya iyo mawdkaba, sidoo kale waqtiga wax kafahan iyo dareenkeene.

Ma ahan inuu ooga hadlayo micnaha muuqda ee mawdka ama sida aan umalaynayno markaan maqalno magaca mawd waxaa maskaxdeena kusoo dhacaya dhamaanteen qof geeriyooday , wuxuu

fiirinaaaya dhinaca kale ee micnaha mawdka wuxuu leeyahay jirkeena waxaa ka jira labo hawlood oo hal mar wada shaqaynaya waana dhisid *iyo* dumin waxay matalayaan nolol iyo geeri laga soo bilaabo kolkaan dhalano ilaa markaan dhimanano , hawsha dhisida waxay socotaa inta layaryahay kolkii laduqoobana waxaa sii badanaya hawsha duminta mid walba oo inaga mid ah maydkiisa ayuu garbaha ku wataa!!.

- **Wax kayaab badan majiraan geerida**:

Shaygii jiray wax yar kahor wuxuu noqonaayo eber hal mar mawdku wuxuu wataa nolol wuxuu wataa amakaag, geeridu gudaheena ayay ka dhacdaa daqiiqad walba iyo ilbidhiqsi walba anagoo nool sidoo kale dhibic walba oo dhareer ah, dhibic walba oo ilin ah, dhidid walba oo jidhkaaga kabaxaya wuxuu wataa unugyo dhintay maalin walbanwaan sagootinaa, taasoo ah geeri joogtaa waana markuu leeyahay geerida garbaha ayaan kuwadanaa malaayiin unugyo dhiig casaad ah ayaa dhasha kadibna dhinta.

Marwalba oo aan neef jiidno siina dayno waxaa nagalaayo ogsijiin gubaya beerka iyo sambabada waxaana ka dhalanaya kulayl aad u kulul, kulaylkaasna waxaa kasii dhalanaya dhimasho, waana geeri.

Sidoo kale afkaarteenu way dhalataa wayna dhimataa ,uxiisida quluubteena ayay ka dhalataa kadibna way dhimataa, shalay qof aad jeclayd magaciisana markaad maqasho uu qalbigaagu ku dhaqaaqi jray ayaa maanta markaad maqasho hal unugna ku dhaqaaqayn waana tan ladhaho dareenkii ayaa dhintay waa geeri dareenkii aad shalay qofkaas uhaysay maanta uma haysid oo waa mayd waa geeri xaqiiqi ah .

Shaqsiyadeena way isbadashaa waxaan dilnaa afkaaro hore, qaab dhaqan, fikir, hadaad sidaada iska ahaato waxay ka dhigantahay in

aad mayd tahay hadaadan isbadalaynin noloshu waa isbadal joogto ah farqi uma dhexeeyo geerida iyo nolosha , noloshu waa geeri geeriduna waa nolol si maalinle ah ayaan ugu dhex jirnaa geerida iyo nolosha caleenta geedka ka dhacaysa xiliga jilaalka ah kadibna badalkeedii mid kale soo baxayso waa micnaha geerida iyo nolosha maanta waa maydkii ama geeridii shalay islawaqtigaas.

Dhulku markuu jiilaal yahay ilaahay wuxuu ku tilmaamay inuu mayd yahay dalag iyo daaqna midna malahan waa dhul mayd ah

ولله أنزل من السماء ماء فأحيا به الارض بعد موتها

Dhaqaaqaagu waa joogitaanka meel iyo baaba'aaga isla waqtigaas markaad meel fadhido waxay ka dhigantahay meeshaas inaad joogto markaad ka tagtana inaad halkaas ka tagtay.

Noloshu waa loolan waa labo waxoo isburinaaya noloshu ma ahan isu dheelitirnaan geerida iyo nolosha laakiin waa loolan lagdan adag midba midka kale burinaya oo ka adkaanaayo.

mawdku tallaabada ayuu xadaa sidii tuug habeenkii soconaya wuxuu ku socdaa timaheena maalinba mid ayaa ucadaanasa timaheena inagoonan dareemayn tintaas kucad waa raadka mawdka kugu dul socdo waa sidii beer lasugaayo bislanshiyaheeda markay timuhu kuwada cadaadaan waxaa soo dhaw gurashadii, noloshan inay tahay geeri marwalba socoto markay dadku dhintaan oo lasoo saaro ilaahay wuxuu ku tilmaamay bacthi inay dadku soo noolaanayaay isla sidoo kale habeenkii markaan seexano waxaa loo adeegsaday geeri , markaan seexano waan geeriyoonay markaan soo kacaynana waa soo noolaananay taaso cadaynaysa inaan geeri cad galnay.

Garaaca saacada darbiga ku dhagan waxay inoo sheegaysaa waqti aanan jirin oo sax aanan ahayn waqtigaaga dhabta ah waxaad ka raadisaa garaaca wadnahaaga!!, wax walba oo adduunka yaal way socdaan way ordaayaan qoraxdu way soo baxdaa wayna dhacdaa,

meerayaashu waxay kuwareegaan madaaraadkooda , dabayshu dhinac walba ayay katimaadaa, hirarku waa isdaba rogaan dhaqaaq joogto ah dadka, roobka,noolayaasha kala duwan dhamaan waxay ku jiraan dhaqaaq joogto ah waxaan badanaa maqalnaa waqti mahayo hadaba waa maxay samanku, waa maxayse waqtigu?

samanku maahan wax naga go'an ama naga fog waa shay nagu dhagan nala socda dareenkeena ah waxaan jecelnahay ayaa ah saacada dhabta ah, waqtiga gaabinaya ama dheeraynaya saacada iyo samanka laguu sheegaayo waa dareenka aad dareemayso haduu yahay dareen fiican ama dareen xun, markaan xanuun dareemayno waxaa moodaa inuu waqtigu gaabinayo dareenka ah in waqtigu xawli kusocda ama uu taaganyahay ma ahan miday saacadu shaqo kuleedahay waa waxaan dareemayno xaalada aan waqtigaas kusuganahay inta badan markaan asxaabteena iyo dadka aan jecelnahay lajoogna ma dareeno inuu waqtigu nagu socdo laakiin qof saaxiibkaa ah hadii uu ku dhaho halkaan iisii yara istaag hal saac halkaas saac ayaa wuxuu kulanqoanayaa shan saac oo kale , saacadu waa koowdii waa labadii waa sadexdii waa muujin kaliya dhaqaaqa tiirkaas saacada ee dhawr sintimitir dhaqaaqaaya samanka dhabta ah anaga ayuu nala socdaa dareenkeena iyo qaabka aan unoolnahay weeye!!.

markaad seexato waxaad isku badali geed waxaa dhacaya suuxdin mugdi ayaa galaysaa waxaa isku badalasaa sidii geed meel ku yiila nolosha kaliya ee aad kusocoto waa midaan wax iraadaa aan lahayn hawlaha jirka ayaa shaqaynaaya sida geedku uu uqaato ogsijiinka dhaqaaq la'aan waxaa meesha kabaxay micnaha bani'aadamnimada waxaad noqonasaa geed waana tan hurdada lagu tilmaamay geeri.

Hadaba maxaa kafahantay mawdka, waxaan ogaanay inaan maalin walba mawdka lakulano garbahana aan kusidano.

Aan kusoo gabagabayno odhaah uu yiri *dr:* ***Mustafa kamaal maxamuud***

“Aan iska caabino waxay naftu jeceshahay in aan samayno sidoo kale aan udulqaadano waxaan necebnahay waxay naftaadu necebtahay ee ay karaahiyada u aragtana waa waxa faa’iidada kuu ah labadan daarood

CUTUBKA 12AAD

GUUSHA NAFTA

Waa maxay Guusha nafta?

Marka aynu isbarbar dhigno guusha iyo Nafta waxaynu orankarnaa waa laba eray oo isku tiirsan Tusaale ahaan guushu. waa hadafkii ama yoolkii uu qofku lahaa isaga oo umaraya waddo sax ahNaftuna waa ficilkii samaynlahaa guusha Guusha waxaa lagu qeexaa habab kala duwan oo midkastaa tilmaamayo micnaha guusha hadaba aan is bar-bar dhigno qeexitaano dhawr ah oo laga soo xigto faylasoofyo kala duwan oo caan ah mar wax laga wey diiyey faylasofkii la oran jiray *ISAAC ALEX PHIRI* waxa uu kusoo koobay saddex hab.

1. In aad gaarto halka aad ku riyoonayso
2. Marka aad hesho waxa aad ubaahnayd oo aad ku riyoonaysay
3. Marka aad katilaabsato duuruufaha iyo caqabadaha nolosha kugu gadaaman

Erayga Guul waxaan ku micnayn karnaa anagoo u eegayna xaraf walba iyo macnihiisa.

G: Go'aan inaad leedahay

U: U fakarida si waayo aragnimo leh

U: U dul qaad badan tahay dhibka

L: Lee dahay hadaf iyo qorshe/Lahaansho nafeed yacnii inaad naftaada leedahay.

QAYBAHA GUUSHA

Marka aynu kahadlayno adduunka iyo Aakhiro guushu waa labo qaybood waana sababta Ilaahay wax walbaa uga dhigay labo-labo, qofku haduusan ku guulaysan imtixaanka aakhiro ogoow inuusan ku guulaysanayn imtixaanka aduunka oo taas micnaheedu yahay hadaadan aakhiro guulaysan aduunka ma guulaysanmaysid sababtoo ah waxa waaraya waa guusha aakhiro laakin tan adduunku waa mid dhamaanaysa hadaba maxaa kuu diidaya inaad labadaba ku guulaysato?.

Waxaa loo baahanyahay in aad fikirto oo aad xisaabtanto si aad u yeelato hadaf iyo qorshe aad adduun iyo aakhiraba guul ku gaaraysid.Waxaad garataa sababta aduunkan laguu keenay, waxaad xaqiijisaa adoonimadaada iyo waxa uu Alle kuu abuuray.

Guushu kuma xidhna dharka aad xidhantahay, gaariga aadwadato, lacagta aad haysato, magaca aad leedahay iyo shaqada aad qabato, ee waxay ku xidhantahay qalbiga iyo adoonnimada Alle oo aad kadhabayso.

Tusaale Guusha Akhiro Alle waxa uu Kitaabkiisa kuleeyahay wuxuu qofku guulaystay kolkuu naar kabadbaado ee Jannada uu galo cagsigeeda tan aduunku waa mid dhamaanaysa.

Taasina waxa ay ina tusaysaa Guusha dhabta ah in ay tahay Guusha aakhiro Qof kasta oo inaga mida maraadin karo guul sababtoo ah dadka adduunka kunool marka loo fiiriyo 100% waxa ay leeyihiin hadaf marka laga reebo qofka aan fekerin ama aan xisaab tamin cilmi baaris lasameeyey ayaa waxaa la ogaaday in 3% ay kuguulaystaan hadafkooda waxaana loo sababeeyey arrinkaas in 97% aysan hadaf iyo himilo saxa lahayn.

Qofkasta hadafkiisu waa riyo uu leeyahay waxuuna rabaa in uu rumeeyo waa in uu fikiraa oo uu qaadaa wadooyinka guusha lagu gaaro waana sababta loo yiraahdo fikirkaagun yuusan kugu dhiman hanka iyo himiladaadana dheeree.

Noqo qof is aamina oo isku kalsoon,soona saara awoodihiisa u qarsoon awoodu maahan mida jirka sida ay dadbadan aaminsan yihiin awooda dhabta ah waa maskaxdaada oo aad kashaqaysiiso una fikirtid si togan dabadeedna aad soo bandhigto awoodaada maskaxeed waa in aad saamayn kuyeelatid bulshada aad la nooshahay tusaalena aad u noqotid dadka leh hibooyinka qarsoon oo aan ku dhiirran in ay soo ban dhigaan.

Waa in aad garatid waxa aduunka laguu keenay dadbadani magaranayaan sababta loo abuuray ama loo keenay dunidan hadaba waxaad ogaata adigu dunida uma baahnid ee iyadaa kuu baahan sababtoo ah waxaa laguu keenay inaad wax ku soo siyaadiso ee maahan inaad wax kanus qaamiso hadaadan dunida kusoo kordhin wax dheeraad ah ogoow adigaa dheeraad ahTusaale:waxa uu Alle soo diray Nabi muxamed (N,N,K,H) waxaa lagu yiri Waanu kudooranay ee waxad umadayda gaarsiisaa kitaabkan isaga ayey wax walba ku idil yihiin Nolosha Aakhiro iyo tan Aduunba sidaa daraadeed Nebi muxamed (SCW)waa uu guulaystay laakiin waxa uu layimid sifooyin uu ku guulaysto Rabbina ku amaanay isagoo Dhibaato badan loo gaystay saxaabadiisiina la laayey sababtoo ah waa uu ogaa in Guusha Aakhiro ay kaweyntahay mida adduunka Alle waxa uu ku yiri Qur'aankiisa "kuwa mu'miniinta ahoow ma idin tusiyaa camal cadaabka lagaga badbaado , Ilaahay rumeeya iyo Rasuulkiis Ilaahay dartiisna u dirira naf iyo maalba saasbaana idiin khayr badan hadaad wax garanaysaan"markale Alle waxa uu leeyahay "Hadaad sidaa yeeshaan ilaahay dambigiina wuu dhaafayaa Janana waa idin gaynayaa iyo beero hoostooda webiyaal dareerayaan iyo guryo fiican taasi waa liibaanta weyn maadaama ay heleen guushii weyneyd ee

Aakhiro midi aduunkana waa ay gaareen oo mida Aduunku Maxay ahayd Alle waxa uu leeyahay Gaalkana inaad kaxoog badataan waxna furataan waa guusha Aduunka ey gaareen Nebiga iyo saxaabadiisu.

"Hadafka dhabta ah ee qofku leeyahy waxa weeye in uu naar kabadbaado janadana galo waana in aaad kudartid hadafka adduunka aadna xaqiijisid sidii ad raad ugu reebilahayd Adduunkan uguna noolaan lahayd Nolol faa'idol eh"

Su'aasha is weydiinta mudan waxa weeye Sidee baan ugu Guulaysan karaa Nolosha Aakhiro iyo tan Aduunyo? si aad ugu guulaysato nolosha waa in aad Aamintaa in aad gaari karto Guusha labada daarood waa adduun iyo aakhiree ogoow guusha aakhiro iyo guusha adduunkuba waxay ku jiraan raali ahaanshaha alle.

Waxaa jira wadooyin kuu fududaynaya kuuna soo dhawaynaya iftiinka iyo kaaha guushaada yadadiilana ku galinaya ladoonayana inaad samayso waa kolkaad qalbi saafa ah leedahay iyo niyad saliima.

WADOOYINKA KUU SAHLAYA GUUSHAADA WAXAA KAMIDA.

Way badanyihiin anagoo soo koobana waxaan kasoo qaadanaynaasagaal qodob waana sagaalka qodob ee aan is niri waa kuwa ugu muhiimsan ee waddooyin unoqonkara baadi-goobka guusheena.

Qodobka koowaad:

1. **IS BEDEL.**

   Si aad ugaadho Guul waa in aad samaysaa isbedel, si aad usamayso is bedel waa in aad samaysaa saddex shay oo aas- aas u ah Guu shaada.

Is bedelka waxaa loo qaybiyaa saddex nooc marka hore naftaada wax ka bedel, marka xigtana bulshada aad la nooshahay, marka u dambaysana adduunka wax ka badal.

1. AAMINID: waa in aad aaminsantahay in aad is bedeli karto oo aad gaari karto guul noloshaadana ay meeshay u xuntahay aad ka badasho meesha wanaagsana aad ubadasho.

2. RABITAAN: waa in ay kaa go'antahay in aad is bedel samaynkarto guulna gaari karto aadna ubaahantahay waxay naftaadu rabto rabitaan guulna ay kaamuuqato.

3. DOORASHO: waa in aad doorataa nooca is bedel aad doonayso ama aad rabto.

Qodobka labaad:

2. HADAF

Hadafku waa riyada aad lahayd oo aad meel ku qortay isla markaana aad qorshaysatay in aad gaadho si aad hadaf u yeelato waa in aad leedahay han iyo himilo kuu gaara oo aad dadka kale uga duwantahay waa anagii horay usoo sheegnay nolosha waxa macnaha uyeelaya waa hiigsashada himalada qofku haduusan lahayn meel uu udhaqaaqo dhamaadkiisu wuxuu dhayda lacabidoonaa rag ku dhiiranaaday himladooda gaarayna hadafkoodii.

Qodobka saddexaaad:

3. QORSHE

Markii aad samayso isbedel aadna qoratid hadafkaaga waxaadan kamaarmin qorshee waayo hadii aadan qorshayn sidii aad ukala hormarinlahayd hadaf yadaada kuu gaarka oo aad qalinka ku duugtay way adkaaneysaa sidaadwixii guusha kuu ahaa aad ku hanatohadaba waa inaad yeelataa qorshe.

Tusaale:

waqtigaaga waa inaad qorshaysaa sidii aad ukala isticmaali lahayd, waayo waqtigu waa shay qaaliya wax yaabaha badanaa dadka waqtiga kalumiya waa qorshe la aanta hadii aad arday tahay waa in aad leedahay jadwal kuu degsan oo waqtigaaga ku maarayso waxaad noqonaysaa qof wax soosaarleh waayo wax loofikiray oo laqorsheeyey waxa ay dhalaan midho midhahaaso ah guushii aad gaadhay oo aad guranayso waa in aad waqti ku bixisaa sidii aad uyeelan lahayd qorshe Qorshaha waxaa loo qaybiyaa labo:qorshe dhaw iyo qorshe fog, Qorshaha dhaw waa midka aad u diyaarsatay inaad ku rumayso hadafyada yar-yar qorshaha fogna waa midka aad u diyaarsatay inaad ku rumayso hadafyada waa weyn.

"Hadii aad ku guul daraysato in aad qorshe yeelato, ogoow waxa aad qorshaysatay guul daro"

- *Qorshaa libin lagu helaa,*
- *lagu Qaabeeyaa waqtiga,*
- *Qiimaha hadafka iyo,*
- *Quruxda noloshaada bilan*
- *Waxa haga Qorshee ogow*
- *Intaadan Qoomamayn hadhaw,*
- *Hadeer Qabya tiroo habee*.

Qodobka afaraad:

4. HAN

Hanku waa hammiga uu qofku hiigsanayo si uu ugu tilaabsado hormar iyo guul waana ficilka kugu dhiiri galinaya in aad istaagto si aad uga dhabayso rajadaada ugana mira dhaliso himiladaada iyo hadafkaaga, waa inaad lahaataa han si aad ugaadho hab socodka guushaada waliba si habsami leh.

"Hankaagu waa hurumarkaaga"

- Himiladaada dheeree
- Hiigso meel saraysoo
- Hadafkaagu yuulumin
- Wax ku Hiifa waad helin
- Neceb Horumarkaagee
- Inta aad Hayaan tahay
- Heedhe samirkaa adkee
- Naftu Hadimo weeyee
- Hogaankeeda hay oo
- Ku ilaali Horusocod
- Haybad waxaad ka dhigata
- Halka aad usocotid
- Hiilna waxaad kadhigataa
- Cida aad la Heertahay
- Naftaadana Hubsiimiyo
- Ku Hogaami diintoo
- Ha iloobin waxaa tahay

Qodobka shanaad:

5. DADAAL

Dadaalku waa furaha ugu muhiimsan ee guusha lagu gaaro Tusaale dadka waxaa looqaybiyaa labo,

Dad nolosha kuguulaysta iyo kuwo ku guul daraystafarqiga udhexeeyaa waa dadaalka, waa hubaal hadii aad dadaasho oo aad samayso isku day badan iyo ku celcelin in aad mar uun gaari doonto guul,

ALBERT EINSTCIN oo ahaa saynisyahankii ugu caan sanaa qarnigii 20aadwaxa uu yiri *"guushu waxa ay saamigal toos ah u tahay dadaalka"*oo micnaheedu yahay guushuba waxay ku xidhantahay

dadaalka hadii aan dadaal jirin guul ma imaanayso waxaa kaloo lagasoo xigtaa soo maalida in ay yiraahdaan Qofka dadaalaa wuu gaaraa oo waxa uu ku dadaalay midhahooda ayuu gurtaa maah-maah carbeed ayaa waxay tiraahdaa.

من جد وجد ومن زرع حصد

Abwaan **IBRAAHIM CISMAAN CUMAR**waxa uu hal abuurnimadiisa ku cabiray in marka aad hadafkaaga qorshaysato si aad ugaarto hiigsigaaga iyo himiladaada aadnalatimaado dadaal waxa uuna yiri in yara:

- Markaad Hindistoo qorshayso
- Si aad Hirashada u dhabayso
- Hawshaada dadaal ku biiri.

Qodobka lixaad:

6 .KALSOONI

Kalsoonidu waa in aad aaminsantahay awoodaha rabaaniga ah ee kugu dhex nool adiga aad soo saari karto.sidookale waa in aad u aragtaa in aad wax soo kordhin karto guulna gaari karto.

Waxa lagu tilmaamaa halka fure ee guusha furaha u ah in ay tahay kalsoonida, sidoo kale furaha kalsoonida waxaa lagu tilmaama in uu yahay diyaar-garowga.diyaar-garowgu waxa uu kaa caawinayaa in aad naftaada ku kalsoonaato oo aad wax noqotid waxaadna ku dhiiranaysaa in aad noqoto raadiya ama raacdeeya himiladiisa.

Abwaan **maxamed tukaale** waxa uu noosheegayaa in aan nafteena iyo nolosha aan dariska lanahay sikastoo ay tahay ama waqtiga iyo duruufa noloshu haku saacidiwaayeen ama caqabadkasta oo kusoo wajahda aadan marna rajo dhigin oo aad ku kalsoonaato naftaada iyo

waxa aad manta tahay, inaadan nolosha ka eegin meelkale ama qof kula dhigaaya oo guul gaaray ee aad nolosha ka eegto lugahaaga.waxa uu maanso ku yiri:

- Haka Dayrin waligaa
- Noloshaad la Daristahay
- Ha u Doodin abidkaa
- Midkaloo Ku Dayasho leh

Qodobka toddoobaad:

7 .HALGAN

Halganku waa marka aad guusha u raadisid si dhaba adiga oo umaraya heerar kala duwan oo aad ukharaar micnaheedu waxa weeye in ay duruufi kugu hareeraysantahay markii aad raadisid sidii aad ugabixilahay oo aad ugaari lahayd guusha nolosha aduun iyo tan aakhiraba,wadooyinka aad umarayso,jabka iyo qodaxda halkas taal si aad uga gudubto ayaa waxa layiraahdaa halgan.

"Halganku waa sirta guusha, Guushuna waa sirta nolosha"

Waxaynu tusaale usoo qaadanaynaa sheeko dhex martay wiil yar iyo nin faylasof ahaa:

Wiil yar ayaa waxa uu raadin jiray sirta nolosha oo micnaheedu yahay guusha nolosha,wiilkii waxa uu utagay nin faylasof ah oo la yiraahdo **SOCRATES**waxaa lasheegay in uu joogay meel webi ah,wiilkii markii uu utagay faylasofkii waxa uu waydiiyey su'aal waxa uu ku yiri "waa maxay sirta lagu guulaysto"?ninkii faylasofka ahaa waxa uu galay webigii waxaana uu wiilkii ku yiri soo gal webiga wiilkii waxa uu galay webigii,dabadeed faylasofkii waxa uu qoorta ku dhagay wiilkii isagoo madaxiisa hoos biyaha u galiyey kor ayuu ugasoo saaray,waxa uu ku celiyey markale ugu dambayntiina waxa uu keenay banaanka

isagoo biyihii ku haftay isla markaasna raadinaya nasasho iyo neef uu qaato ninkii faylasofka ahaa ayaa waxa uu weydiiyey wiilkii su'aal waxa uu ku yiri maxaa u halgamaysay oo aad raadinaysay markii aad biyaha dhexdooda ku jirtay?wiilki waxa uu yiri "Hawo" faylasofkii waxa uu yiri "Taas ayaa ah sirta lagu guulaystomarka aad guusha aad uraadisid una halgantid sida ugu adag yacnii sidaad uraadinaysay hawada oo kale guushana uraadi sidaas oo kale.

Sheekadan waxaan ka fahmaynaa in guusha lagu gaaro halgan adag iyo dadaal dheer iyo talo saarasho rabbi.

Sidoo kale Abwaan **XASAN DAAHIR WEEDHSAME**waxa uu inoo sheegayaa in qofka halgamaayi ama dadaalaayi uusan hungoobin isla markaana aad tahay qof isku filnaan kara aa yihiisa mustaqbalkiisuna gacanta ugu jiro, waxaa kale oo lamahuraan ah dadkaaga inaadan ka go'aynin doqonimana kaa dheertahay waxaan kasoo qaadanay abwaanka gabaygiisa in yaroo kooban waxa uuna yidhi sidan isagoo kahalaya guusha iyo raadinteeda.

- Qofbaa tahay Guul abuura
- Qofbaa tahay Guri yagleela
- Qofbaa tahay Gaar ahantii
- Ku Gaajo baxoo Iskeena
- Aqoontaaduna ma Gaabna
- Ma Gaagixin aayahaagu
- Dadkaaguna kuma Giriifin
- Dadkaagana kama Go'aysid
- Gob baatahay moog inteeda.

Qodobka siddeedaad:

8. DULQAAD

Dulqaadka waa wadada lagu gaaro wax walba oo larajeeyo, sidoo kale waa raali ahaanshaha masiibooyinka iyo caqabadaha nolosha kula

soo gudboonaanaya.waayo Allaah (SW)ayaa noo sheegay oo nayiri "kaashada samirka iyo salaada" Nebi muxammed(scw)kaligii ayaa u istaagay inuu diinta iyo dacwada ilaahay dadka gaarsiiyo oo umada xaqa iyo baadilka ukala cadeeyo sidoo kale xalaasha iyo xaaraanta ukala saaro hadana waxa uu maray dhibaatooyin farabadan lakiin maxaa lagu yiri waxaa lagu yidhi ilaahay dartiis usabir waxaa kale oo tusaale mug weyn oo wax ku oola noogu filan ambiyadii ilaahay soodiray oo dhan waa lawada imtixaanay waxaana lagu yiri sabra wad guulaysanaysaane sidii bayna sameeyeen.sidaa daraadeed adiguna nolosha manta lajoogo ee aduunyo waxaad ku jirtaa imtixaan waxaa tahay buuxinaya waraaqo banana waxaa lagaarabaa waxaad waraaqahaa ku buuxin lahay inaad sabirto oo ay noqdaan wax ku anfacaya aduun iyo aakhiro. Dulqaadka lagama maarmo waayo hadaad wax baranayso, hadaad dad hogaaminayso, hadaad diinta faafinayso markastaa waxaad ubaahantahay dulqaad dul qaadku waxa uu ina barayaa in hadii manta guul daraysato aadan quusan barito sidoo kale saadambe, waayo guushu qofna lama dhalan laakiin waxaa la is dheeryahay waa dulqaadka iyo dadaalka.

Qodobka sagaalaad:

9. DHIIRANAAN

Waa maxay dhiiranaan?Dhiiranaantu waa kartida iyo firfircoonaanta aad uleedahay shaqakasta ama hadafkasta oo aad doonayso in aad xaqiijiso,wax walba oo aad isku dayeyso waxa jira in ay jiraan wax kugu dhiirigalinaya.tusaale hadii aad maantay wax baranayso oo aad tahay qof hab-fikirkiisu wanaagsanyahay oo aad ogtahay in wadada aad ku socotid ay tahay mid toosan oo xaq ah oo aad rabto in aad noloshaada mustaqbalka aad noqoto qof aqoonleh oo isku filan heerna gaari kara adigoo raba in guushaada aadan cidna udaba fariisan oo aad tahay qof og imtixaanka iyo marxaladaha kaladuwan ee aad nolosha kasoo martay aadna kamari doonto hadana aad tahay

qof aan rajo dhigayn oo horay usocda kuna quudinaya maskaxdaada dulqaad,dadaal iyo kalsooni taas ayaa layiraahdaa dhiiranaan

Marabtaa inaad noqoto qof noloshaan imtixaanka ah ku guulaysta mar walba waa inaad Allaah ku xidhnaataa oo aad samaysaa waxa uu kaaga baahanyahay oo uu kufaray kana hartaa waxa uu kaareebay waa inaad Allaah ku kalsoonaataa oo aad talosaarataa ku dadaal kudayashada aadana basharkii ugu wanaagsanaa ee lagasoosaaray Nebigeena muxammed (N.N.K.H) isaga ayaan wax walba kabaranaynaa isaga ayaana noogu filan tusaale.

Naftaadu yeysan ku hogaamin ee adigu hogaami.ha raali galin nolosha ee waa inay iyadu ku raali galisaa.sidaa daraadeed waa inaadan raacin wax yaabaha hawadaadu jeceshahay,taas micnaheeduna waa inaad deg-degayso.deg-geguna waxa uu kaa burburinayaa dhamaan qorshahaaga iyo camalkaaga.waa inaad si daganaan ah ku fikirtaa adigoo wax kasta oo samaynayso ufiirinaya saamaynta faa'iidada iyo ujeedka aad usamaynayso.Wali waxa aad haysataa jaanis,waqti,caafimaad, waxaa laga yaabaa qof kulamida oo aan intaa haysan inuu jiro,waxaa laga yaabaa qof aan rajadiisii rumayn inuu aduunkan kategey. in taad curdanka tahay waxaad haysaa awood iyo fir-fircooni aad kula tartanto asaagaa hadaad maantay aadan fikirayn oo aadan xisaabtamayn misna aad cunto aadna cabto seexatana waxaa tahay qof nolosha kadhintay orodoo noloshaada sii dadka ubaahan ayagay wax taraysaaye kawaran hadaad maantay Tuugsanayso(Baryeyso) laba kun oo lagayaabo inaad sigaar ku cabto waxaa tahay qofnolosha ka dhintay dhallinyaradeena soomaaliyeed 80%haday caawa seexdaan waxay ka fikirayaan meeshii ay baritoole qaadka kaheli lahaayeen ama sidii ay dil iyo dhac ugaysan lahaayeen,halka wiilka dhigaa ah uu ugu fikirayo sidii uu dalkiisa iyo dadkiisa horumar ugu tillabsan lahaayeen inaad noqoto isticmaale wanaagsan waxaa ka qurux iyo sharaf badan inaad noqoto ikhtiraace wanaagsan.

“Noqo akhriste wanaagsan si aad u quudiso maskaxdaada, garaadkaaga hab fikirkaagana kor ugu qaado kuna dhaqan waxaad akhrisay si aad u noqoto hal abuure wanaagsan”

Marka aan bilawno jidadka nolosheena bilawgiiba waxaynu dareenaa daal iyo dhib jidka dheer awgiis goortase aan gaarno dhamaadka guusha waxaan dareenaa farxad iyo daganaan qalbiga ah si fudud waynu uhilmaamnaa daalkii iyo dhibkii aynu soo marnay “wataas nolosha saxdaa”!!.

U orod si adag waan hubaa daalka waad hilmaami doontaa maalinka aad gaadho xariijinta ama daliigta guusha, wax qurux badan bixi si aad wax qurux badan uhesho,Libaaxuba wuxuu in badan u ordaa si uu uhanto ugaadhiisa xitaa haday lagasho wabi biyo ah wuxuu iska indho tiraa qabawga iyo badnaanshaha biyaha si uu ugaadhsigiisa uga dhigo mid rajo ku dhamaaday.

{Noloshuna wataas} {هكذا هي الحياة}

QISO

Hadda waa dabayaaqadii 2010-ka waxaynu joognaa magaalada buenos Aires ee dalka arjantiina amintaan qisadaan kuusoo warinayana waa abaaro sagaalkii iyo badh saacada geeska afrika, Waa qiso kuu kaxaynaysa jidkii riyooyinkaaga damacna galinaysa yoolkaagaAana Androvaoo ah gabadha aynu qisadan kaga hadlano waa gabadh ka dhalatay qoys muslimah oo aan taag iyo tabar-toona kaga muuqan bulshada taasna ay udheertahay tiirkii qoyska oo aabaha ahaa inuu geeriyooday **AANA** waxay go'aan adag ku qaadatay tiraba dhawr jeer inay noqoto qof ay bulshadu isku tilmaamaan balse go'aankaasi ma uusan raagi jirin waqtiga oo aanan cidna sugaynin awgii **Aana** hadda waxay gaadhaysaa go'aankii udambeeyay ee nolosheeda oo ah inay usafarto magaalada baqdaad ee dalka ciraaq si ay usoo barato asalka taariikhda taasoo dhabaha uxaadhaysa inay noqoto taariikhyahan barashada taariikhduna **AANA** waxay unoqotay bilawgii nolosheeda.

Imaanshiyihii baqdaad **AANA** waxay bilawday dadaal dheer oo ay meesha kaga saarayso xusuusihii hodhe ee kaga hadhay nolosheedii, saddex sano iyo dadaal joogtaa **AANA** waxay noqotay taariikhyahan soobaxay oo aan cidna ugu daba faylin kawaranka taariikhda, wali madhawa geedigii iyo socdaalkii ay ujirto rumaynta riyooyinkeeda odhaahyo badan ayaa kahadhay xiligii ay dadaalka waxbarashada waday waxaana kasii xasuustaa ,

"Guuldarada iyo fashilku waa caadada guulaystaha balse isdhiibida iyo niyad jabku waa caadada kuwa guul daraystay "

Baqdaad ayay **AANA** kawadaa dadaal kawareeriyay xitaa barayaashii carbeed ee jaamacada udhigayay waxay si isdaba jooga uraadinaysaa xog kusaabsan xeebaha geeska afrika iyo godadka taariikhigaa ee

dhaca cidhifka qaloocan ee afrika gaar ahaan bariga fog ee xeebaha soomaalida, tani waxay noqotay mashruucii ugu hawsha badnaa ee ay qabato **AANA**.

Waxay safarkeedii ugu horeeyay ugu soo baxday xeebaha fog ee **xiis** iyo **maydh** oo dhaca teedka waqooyi bari ee badda cas, xiis iyo maydh waa magaalo xeebeedyo aad uqurxoon indho waliba oo halkaas arkayna ay markhaati kayihiin.

socdaalkay **AANA** ku gaadhay xiis iyo maydh wuxuu ahaa midkay ku ogaatay xogta ay dib kaheshay ee kusaabsan sawir gudeedka Laas-Geel, laas-geel oo ah deegaan masaafo ahaan udhaw magaalada hargaysa ayay qorshe ku meel dhigtay wallow aysan hilmaamsanayn inay sidoo kale tagto jasiirada caanka ah ee kutaala xeebaha woqooyi ee dhulkeena hooyo waa **Sacaado-Diine** jasiiradan oo ah mid aad uxiiso galisa dalxiisayaasha ayay xog baadhis ugu baxasaa **mrs:AANA ANDROVE**, hadase waxay aruurinasaa xogo kusaabsan asalka taariikhda soomaalida iyo xadiga macdanta laga heli karo dhulkan oomane xigeenka ah misna gubanka ujan-jeedha ee soomaalidu dagto erayo laga su'aalay soomaalida iyo siday u aragto ayay waxay kaga jawaabtay.

"Soomaalidu waa dad caqli ahaan uxoogan, deeq badan wajiyadooduna ayba kuwa kale ugu filanyihiin jaantus ama maab".

Dad badan ayaa wax laga su'aalay qisada dadaalka iyo xamaasada leh ee gabadhan reer arjantiina waxayna badankoodu kujawaabeen aana waxay tusaale cad utahay kumanaan haween ah oo aaminsan in dadaalka iyo guusha ay tahay mid raga ugaara hadaba ha aaminin in guushu tahay mid labka ugaara amase dhadiga ugaara hadaa tahay gabadh guul waad gaari kadhaa waliba mid wax ku'oola hadaa wiil tahayna sidoo kale guul waad gaadhi kadhaa aamin naftaada"

“GUUL DARADA IYO FASHILKU WAA CAADADA GUULAYSTAHA BALSE ISDHIIBIDA IYO NIYAD JABKU WAA CAADADA KUWA GUUL DARAYSTAY”

GO'AANKANAFTA:

Waa cutub yar oo dhextaal ah kaasoo ka hadlaya go'aamada qofka uu qaadanayo in yadh ila gorfee go'aamada naftaada si aan u ogaano bal inaad qaadato go'aano saxan iyo kuwo khaldan.

Eebbe inooma abuudhin inaan qaadano go'aano saxa ama kuwo qalad ah balse Eebbe wuxuu inoo abuudhay in aan qaadano go'aano kadibna wixii qaldan aan saxno.

Waxaa hadda kahor jirtay sheeko run ah oo taariikh iyo sooyaal ah taas oo ku dhacday hogaamiye ciidan watay asagoo qaatay go'aan adag oo ciidankii usoo hooyisay guul wayn oo wax ku'ool ah ninkaasi wuxuu ahaa nin la oranjiray **daariq binu siyaad** isaga oo hogaaminayay ciidan aan badnayn ayuu wuxuu ka tallaabay badda udhaxaysa marooko/maqrib iyo Andaluusiya/isbayn una tallaabay dhankaas iyo Anduluusiya kadib markii ay ciidankiisi isku dhaceen ciidankii kasoo horjeeday deegaankana lahaa ayuu wuxuu dareemay in ciidankii uu watay cabsi soo food saartay oo ay dib ujaleecayaan doonyihii ay badda ooga soo tallaabeen daariq markii uu xaalada qiimeeyay waxaa umuuqatay in waxa kaliya ee ciidankaas horyaala ay tahay guul ama geeri ma uusan walaacin ee islamarkiiba wuxuu qaatay go'aan adag wuxuuna amray in dab laqabadsiiyo doonyihii ay wateen ciidanku.

Kadib markii dab laqabadsiiyay doomihii ciidankiina ay u muuqato doomihii oo bas belay ayuu ciidankiisii wuxuu ku yidhi baddii waa idin ka dambaysaa cadawgiina waa idin kahoreeeya ee xagee ucararaysaan? Ciidanka caad iyo humaagna kama saarna xaalada ay kusuganyihiin oo ah inay guulaystaan oo cunto, biyo iyo nololba helaan iyo inay guuldaraystaan oo gacanta cadawga ku dhamaadaan

Hadaba maadaama aysan jirin kaabad ay dib ugu noqdaan waxa ay ku khasbanaadeen in ay cadawga jabiyaan sidaas ayayna guul kusoohoyiyeen.

nuxurka sheekadaas taariikhiga ahi waa muhiimada ay leedahay go'aanka adag ee laqaataa marka aad rabto inaad noloshaada wax wayn kabadasho aadna kacabsanayso go'aanada kuhoryaala waxaa haboon inaad jarto wax allaale iyo wixii suurto gal kadhigi kara inaad kufekerto ama umuhato dib unoqosho ,ogow mar allaale iyo markii aad qaadato go'aan suurtogal kaaga dhigikara inaad himiladaada hanato waxaa lahubaa inay caqabado faro badan kaa hor imaanayaan marka sida daariq ibnu siyaad ayaa haboon inaad jarato kaabadaha kugu keeni kara inaad dib unoqosho umuhato taladu waxay tahay hadii aad guul rabto goy xadhiga ama kaabada kaadanbaysa si aadan dib unoqosho umuhan.

Maalinta aad go'aan saxa qaadatana waa maalinta aad cagta saadhay wadadaadii saxda ahayd ee guusha, ka digtoonoow go'aanada aad uqaadanaso inay noloshaada wax kabadalaan maxaa yeelay go'aano khaldan oo laqaato ayaa nafsadaada qiimo la'aan ku keeni kara kalsooni darana kugu beeri kara marka ka fiirso go'aamada wax ku oolkaa ee aad qaadanayso naftaada qiimaheeda meel hakaga dhicin sharafi waa intaad naftaada lakaashanayso go'aamada waa wayn maalinka aad go'aan kaligaa iska qaadato adoon naftaada kawaydiin su'aalaha kaaga imaan doona go'aankaas wixii kadhasha waa maalinka aad naftaada qiimaheedii lumisay kalsooni daro wayna aad ku riday.

Hal go'aan oo aad si qaldan uqaadato ayaa waxaa macquula inaad noloshaada iyo mustaqbalkaaga kuwaydo.

Tusaale: hadii aad tahay gabadh dhalinyaro ah oo wax barata ,waxbarashada dugsiga hoose qoyskaagana aadan waxba dhaqaala ku ogayn ayaa waxaad si dhaqsaa oo aan ka baaraan dag lahayn u qaadatay go'aan ah inaad nin guursato si hoose oo sirran ah waliba nin aad isku leefal tihiin lacag,aqoon,qoys,waqti aanan intaba kugu dhaamin dabadeed kolkuu ninkii ku guursaday ayaa waxaa dhacay inaad uur-jiif qaado yacnii ilmo inaad qaado ninkii kolkuu arkay inaad ilmo qaaday uuna ogyahay inuusan awood ulahayn inuu kafaalo qaado ilmahaaga iyo adigaba ayuu ku yidhi walaaleey intaadan dhalin ayaan ku furayaa sababtoo ah kuma kaafin karo lacagna mahaysto qoyskayguna ma oga inaan guur kujiro marka waan kufurayaa ee iga raali ahoow markaad dhasho ayaan kusoo booqanayaa insha' alaah handhaw ayaad bilaabasaa wareer iyo wal-bahaar aan cidna kula ogayn ugu dambayntiina qoyskaagana ay ku dhahaan sharaf malihid naftaadiina ay noqoto mid qiimo beeshay hadaba ogoow xaaladaas adaa isgashaye go'aankana adaa qaatay kolkii hodhe "waa garaangarta kabax adigu ileen adaa galaye " wax walbana waxaa kuu horseeday go'aankii qaldanaa ee aad qaadatay adoo ardayad ah hadana qoyskaaga waxba aanad ku ogayn ninna isku gashay gacanta.

Waxaan la hadlayaa dhalin-yarada wiilasha ah aad uraadiya marwo wanaagsan markaad eegto ku farxad galisa, markaad u caroota ku xafidaysa, markaad amarto ku adeecaysa, markaad khaldanto ku saxaysa, wanaaga kula jecel xumaantana kula neceb. Adduunka oo idil waa mataac ama raaxo waxaana ugu khayr badan raaxada marwada wanaagsan, marwo wanaagsan ayaa nin wanaagsan soo saarta.

Gabdhuhuna waa sidoo kale aad uraadiya nin wanaagsan oo dhaqan wanaagsan leh sababtiisan aad janad ku haleesho.

CUTUBKA 13AAD

XASILLOONIDA NAFTA

Waa maxay xasilloonida naftu?

Marka aynu qeexayno erayga xasilloonida nafta waxaan u kala qaadaynaa labo qaybood oo kala ah:

1: **XASILLOONI**: waa degenaan kajirta qofka dhexdiisa ama qofka dibaddiisa sidoo kale kajiri karta goob, magaalo, gobol ama wadan waxay kaloo isku macne noqonkaraan erayga (nabad) taasoo micnaheedu yahay xasillooni waana isku micne

2: **XASILLOONIDANAFTU**: waa dareen sheegaya in qofku uusan walwelayn, murugaysnayn, cadhaysnayn ama uusan dareemayn cabsi iyo diiqad si guud waxaanu kusoo koobi karnaa qaacidadii hore oo aynu kor kusoo xusnay (xasilloonida naftu waa degenaanshaha ama nabadda kajirta qofka dhexdiisa isla markaana uu u dareemayo qalbi ahaan)

Hadaba su'aasha is waydiinta mudan waa:

Maxay tahay farqiga u dhexeeya xasilloonida nafta iyo xasillooni daradda nafta?

Marka ay jirto xasillooni darro nafeed waxaa la waayayaa ama meesha kabaxaya waxyaalo kale oo jirilahaa ama wax tar lahaanlahaa marka ay jirto xasillooni nafeed.

Hadii qofku dareemayo xanuun nafsiyan, maskixiyan iyo jir ahaan dhexdiisa kama jirto nabad waayo wuxuu dareemayaa wax dhibaya ama dhaawacaya dareenkiisa nabadeed Tusaale kale hadii qofka xilka hayaa uu cadhaysanyahay laga mayaabo in uu si nabada ama

xasilloon wax ku maamulo taasina waxay saamaynaysaa dhamaan inta ku hareeraysan nabadooda ama xasilloonidooda wayna ku adkaanaysaa qofkaas in bulshada uu lanoolyahay wax laqaybsado ama uu dabeecadiisa kula dhaqmo isla markaasna uu qanciyo.

Kawaran hadii qofka nabadi kajirto dhexdiisa ama uu yahay mid degen oo xasilloon waxa uu noqonayaa qofkaasi mid laqabsada isla markaasna lanoolaada dabeecadaha iyo dhaqamada ka jira aaga-gaarkiisa qanciyana bulshada uu lanoolyahay.

Waxyaabaha keena xasillooni darrada nafta.

Wadada ugu fudud oo degenaanshaha ama xasilloonida nafta lagu hanta waxaa weeye in waxa aad degenaanshaha kahesho aad kobciso, waxa kaa horjooga inaad degenaatana waa inaad faraha isaga qabataa.

MicnahaFalsafada ay ka aaminsanyihiin dadku degenaanta marka layiraahdo qofkaasi waa qof degen waxay dadku yiraahdaan hebel waa miskiin ereyga *miskiin* ayey dadka qaar ku micneeyaan balse sidaas way ka guda ballaarantahay degenaanshiyuhu waa marka ay naftu ugu caafimaadka qabto waa marka hadii ay go'aanqaadato ay soo saarayso go'aanka ugu macquulsan hadii ay istiraahdo wax kutillaabso ay ku tillaabsanayso wadada iyo tubta ugu toosan waana sababta looyiraahdo qofku isagoo caraysan iyo isagoo farsxsan yuusan go'aan qaadan.

Su'aasha iswaydiinta mudan waxa weeye xiriir maka dhexeeyaa nabada dibedda iyo tan gudaha?

Haa wuu kadexeeyaa mid dadban iyo mid toosanba. Marka laga hadlayo caafimaadka waxaa lagu tilmaamaa in uu qofku wanaagsanaado jismiyan, maskaxixiyan, dadka iyo cida uu ladhaqmayana ay wanaagsanaadaan taas micnaheedu waxa weeye hadii qofku maskixiyan iyo jismiyan uusan caafimaad qabin waxay

sababaysaa in bulshadii iyo waxii agagaarkiisa ka dhawaa uu wax-yeeleeyo xasillooni darrada, nabad darrida, degenaansho la'aanta qofka gudihiisa ka jirtaa waxay si toos ah usaamaynaysaa cidda uu la dhaqmayo, cidda uu lanoolyahay iyo meesha uu ku noolyahay.

Badanaa waxaan aragnaa in qof wax nagu sameeyo, in uu wax kugu dhufto, in uu ku caayo markaad waydiiso sababta waxa uu kuugu jawaabayaa waan caraysnaa ama waan xanaaqsanaa micnaheedu waa maxay maalintaa gudahaygaan xasillooni ama nabadi ka jirin taasina waxay sababaysaa in uu kusoo xadgudbo xasilloonidii ama nabadii dibadda ee kaala dhexaysay.

Naftu waxaa ay ku xasishaa oo lahubaa waa cibaadada Allaah hadii ay yartahay cibaadadaadu iyo camalkaagu waxaa yaraanaysa xasiloonida naftaada oo waxaa kugu dhacaysa kalsooni daro iyo caqabado badan oo kaasoo wajaha xagga nolosha hadii ay badan tahay cibaadadaadu wanaagsan yahayna xiriirka kaala dhexeeya Allaah iyo adoomihiisa waxaad dareemaysaa xasilooni nafeed.

Hadii ay naftaadu noqoto mid xasilloon oo degen isla markaana nabadi kajirto gudahaaga waxaad noqonaysaa qof dabeecad, wanaag, akhlaaq intaba usaaxiiba dadkuna ay ku daydaan.

QODOBADA SAAMEEYA XASILOONIDA NAFTA:

1. ***Qofka oo waaya farxadda:***

Waxaa xaqiiq ah in qofku farxadiisa samaysankaro dadbadan farxada waxay karaadiyaan meelkale balse ma oga in ay lugihiisa taalo farxadu, waxaa shaki kujirin shayga aan isbadalayn shakhsiyadiisu waa adiga waxaase dhicikarta in cida kugu hareeraysan iyo waxyaabaha agagaarkaaga kadhacaya iyo waqtigu isbedelaan tusaale hadii lagaakaxeeyo gurigiina iyo walidkaa iyo walaalahaa oo lagugeeyo meel kaduwan deegaankaaga iyo gurigii aad kula noolayd dadkii aad is taqaaneen waxaa dhicikarta in dabeecadaadi iyo

degenaantaadii ay wax iska bedelaan oo aad dareento murugo,welwel,diiqad iyo wixii la halmaala markaas waxaad xaqiijisay in ay farxadaadu,degenaantaadu iyo xasilloonidaadu ay ku xidhnayd dadkii aad katimid ood lanoolayd taasina waa falsafad khaldan ood kadhaadhicisay naftaada waa inaad dib isugu laabataa ood tiraahdaa anigu waxan ahay aniga.

2. Qofka oo been sheega:

Beentu waa astaanta ah in qofku kabaqayo runta waxaan kaloo dhihikarnaa waa cudur qofka nafsad ahaantiisa kudhaca, wax walba waxa ayleeyihiin sabab hadaba waxa aynu isdul taagaynaa sababta ugu wayn ee qofka ku kalifta in uu sheego been.

Kalsooni daradu waxay qofka u sahashaa ama uu caado kadhigtaa in markasta oo uu cidkale lahadlayo in hadalladiisa aysan kamaqnaan been tusaale waxa lagayaabaa hadii aad arday tahay inaad maanta iskuulka ugoyso sabab la'aan baritoole markaad timaado oo lagu waydiiyo meeshaad ku maqnayd shalay waxaad ku marmarsiyoonaysaa wax aan jirin waxaa lagayaabaa inaad tiraahdo waan xanuusanaa, meelbaan aaday,waalidkaa meel iidirsaday IWM beentaas aad sheegaysid waxaa sababay kalsooni darro waayo waad baqaysaa waad welweleysaa degenaan madareemaysid gudahaagana nabad kamajirto xaga diintana waxay kamidtahay calaamadaha munaafiqiinta oo waa khatar in aad sheegto been sidaa daraadeed waa inaad naftaada run usheegtaa dadkana run usheegtaa waxaad aragtidna run kasheegtid runtaasi waxay kaacaawinaysaa inaadan werwer yeelan in aysan kaadhumin nabadii gudahaaga ahayd

3. Qofka oo aan kalsooni isku qabin:

Kalsoonidu waa hubka ama wadada kaliya ee aad ku hanankarto xasilloonida,degenaanta iyo nabadda gudaha naftaada sidaan qodobkii kan kahorreeyey kusoo xusnay in uu qofku been sheego

waxaa keenta kalsooni darada uu ku qabo naftiisa hadaba maxaa keenay kalsooni darada aad ku qabto naftaada horta waa inaad is waydiisaa kumaan ahay?markaad ogaato qofkaa tahay waxaad aaminaysaa ood kukalsoonaanaysaa naftaada hadii kawaran aad istiraahdo waxaan ahay qof daciifa oo aan jirin hal-abuur aan ahayn, wax soosaar aan lahayn waxaad ufikirtay si khaldan waxaad qorshaysatay liidnimo maahan inaad liidatid ee waxaa kugu badan waxa liita hadaba adigaa hanankaranoloshaada farxadeeda,degenaanteeda,jiritaankeeda iyo waxsoosaarkeeda adaa is aaminikara iskuna kalsoonaankara.

4. Qofku oo aan lahayn xuduud:

Waxaa suurta gal ah in aad taqaanid xuduuda laba dal kadhaxaysa lakiin qofku waxa uu leeyahay xuduud hadii uu ilaashanwaayo waxaa meesha kabaxaysa degenaantii sidookale ma xukumikaro afkaarihiisa iyo caadifadiisa taasaa waxy keenaysaa in ay waqti ku qaadato qofku in uu dareemo xasillooni tusaale hadii adigoo taagan aad aragto weerar ama wax khaldan oo kusocda nafsadaada hadhowna kuu keeni kara dhaawac nabadaada gudeed waa inaad fariisataa sidookale hadii aad hadlaysay waa inaad aamustaa sikale hadii aan udhigno qofbaa wax idin dhex mareen lagayaabaa halkaas inay kadhashaan waxyaabo kale cay,dagaal maxaad uga hortagi kartaa taas inaad ka aamusto oo aad xuduudkaaga haysato micnaheedu waa inaadan seerahaaga kabixin markaas nabadaadii gacantaad ku haysataa.

Diinteena islaamka ayaa ah dadaalka iyo wadada loo maro xasilloonida nafta waxaan soo qaadan doonnaa dhawr qodob oo aad uga qayb-qaadankara degenaanta nafta.

1. AKHRISKA QUR'AANKA:

Qur'aanka ood mar walba akhrisaa waxaad ka helaysaa xasillooni iyo daganaan waayo waa qawlkii Allaah (SW) sidoo kale markasta ood murugsantahay hadii aad akhriso kitaabka Allaah waxaa kaa yaraanaya murugada, walwalka iyo xasilooni darada naftaada haysata Qur'aankuna waa dawada qalbiga, waxaadna kahelaysaa farxad iyo degenaan waxaad kaloo kahelaysaa ajar.

Sidaa daraadeed qur'aanka akhriskiisa waa inaan badinaa si aan uhelno xasillooni nafeed iyo farxad sidaa si lamid ah dhammaan Allaah waxa uu inoo sheegay in qofka qur'aanka barta oo ku camal fala in uusan aduunka ku hoogayn kuna hallaabayn aakhirana ku guul daraysanayn ilaahay sw waxa uu leeyahay

"Qofkii kajeesta xuskayga iyo kitaabkayga kaasi waxa uu leeyahay nolol cidhiidhi ah iyo diiqad" hamoodin qofka in adduunyo la'aan iyo lacag la'aan ay tahay diiqadaas laakiin diiqadaasi waa qalbiga iyo nafta, wax deganaan ahna mahelayo hadii uu helo wax walba oo adduunka ah sababtoo ah waxaa kamaqan hidaayadii Qur'aanka iyo xuskii Alle sw.

Mar kale waxa uu leeyahay ilaahay "*maalinka qiyaamana waxa aan soo xaadirinaynaa isagoo indhala oo dam ah"*

Waxa uu oranayaa "*Rabigaygiyoow oo maxaad qiyaamaha ii keentay anoo indha la' sowtaan aduunyada ahaa mid wax arka"* markaasaa Alle ku oranayaa "*sidaasoo kale ayaa ayaadkayagii aduunyada kuugu yimaadeen markaasaad iska indhatirtay ood isaga tagatay adiguna manta cadaabkaas iyo cuqubadaas ayaa lagugu iloobayaa"*

Waxaan halkaas ka ogaanay in quraanku aad u qaybqaato xasilloonida iyo degenaanshaha nafta.

Hadii aynu wax yar is xasuusino mucjisada quraanka iyo karaamadiisa wayn, qur'aanku waa xikmada ugu wayn adduunka ee ay haystaan dadka islaamkaa.

Reer galbeedku quraanka waxay uyaqaanaan isha ugu saraysa ee laga qaato sharciga "**quran is the greatest law giver**" laakin way masaxaan oo way qariyaan mana sheegaan sirtaas wayn ee ay muslimiintu ka fooraraan.

Sharci kasta oo aadane u baahan yahay qur'aanka waa uu ku jiraa isagoo kala faah-faahsan gaaladuse waxay in badan raadiyaan inay muslimiinta ka leexiyaan musjisadaas wayn sharciyadana laga qaato qudhooda iyagoo adeegsanay erayga "***secular law***".

Quraanka waxaa ku sugan xasilooni iyo daganaansho samaawaadka ka wayn sidoo kale quraanka waxaa ku sugan sharciyo kala duwan iyo sidii loo kala abla-ablayn- lahaa sida cilmiga loo yaqaan "***inheritance law*** "waa cilmiga dhaxalkee, quraanku si faah-faahsan ayuu usharaxayaa cilmigaas dadku aysan cadaaladiisa siin.

Quraanka waxaa ku sugan cadaalada iyo sharciga ugu sareeya markaad aqriso quraanka ayaad arkaysaa caddaalada ku sugan kalaamkaas bal eeg aayada odhanaysa, ***An- nafsu bi nafsi , wal caynu- bil cayni, wal -anfu bil anfi, wal- udunu bil uduni, wa-sinnu bi sinni__,*** waa aayad cadaynaysa caddaalada diyada iyo sharciga kitaabka ummada islaamkaa.

Hadaba quraanku waxuu inooga baahanyahay inayu akhrino oo ku taxaluqno, gaalada iyo reer galbeedkuba waxay doonayaan inay jiilasha soo socda iyo kuwa hadda joogaba ay ka leexiyaan jidka quraanka, iyadoon aysan baran, ku dhaqmin, dersin taas badalkeedana ay ku dhaqmaan dhaqanka iyo dustuurada gaaladda.

Wal-walka xasilooni darada, catawga, Intaba waxaa tir-tira quraanka sidoo kale quraanku wuxuu gaashaan iyo ciidan uyahay sixirka iyo junuunta qarsoon oo weerarka dadka ku qaada khaasatan waxaa xijaab xidh u ah **aayatul-*kursiga*** iyo bisinka.

Quraanka ayay ku sugantahay taariikhda dhabtaa ee bani'aadam laga qoro, bal wax yar eeg ***suuratul yuusuf*** waxay ka hadlaysaa qiso ku bilaabanaysa riyo cajiib ah kuna dhamaanaysa fasirka riyadaas cajiibkaa, sheekadaas mid la mid ah ma keeni karaan bani'aadamku waxay ina baraysaa mucjisada iyo xeel-dheeraanshaha quraanka waxayna curinaysaa curinta hal-abuurka sheeko samaynta oo ah awooda ugu wayn ee aadamuhu ku gudbiyo fariimaha.

Xiliga rasuulku gaaladu waxay isku dayeen inay keenaan wax udhigma ama udhaw quraanka balse inagoo garanayna dadka allifa sheekooyinka halkay gaadh-siisantahay dulucdooda inaysan keIni karin wax lamida quraanka gaaladiina way keeni kari waayeen wax udhigma quraanka waloow ay xitaa hal dhibicna ka keeni waayeen iyadoo ay jireen abwaan iyo hal-abuuro waa-weyn oo ku takhasusay curinta luuqada carabiga hadana waxay wariyeen in quraanku aanu carabigay yaqiineen uusan ahayn waligoodna aysan arag, taasina waxay ina tusinaysaa mucjisada quraanka.

Taariikhda hogaaminta tolmoon ayaa ku suntan quraanka waxay daku taariikhda ka baran karaan si ay unoqdaan hogaamiyayaal nolosha saamayn kaga taga,

Waxaa jirta hal aayad oo guusha cilmiga inta ugu badan laga dhaxlo oo muslimiinta akhris mooyee aanay fahmin faa'iidada ugu jirta, waa aayada ka hadlaysa Qaabiil oo walaalkii Haabiil dilay misna garan waayay maydkiisu meel uu geeyo ,waxaase loo soo diray tuke ama quraab asaga ayaa baray aasi-taanka halkaas ayuu qaabiil ku aasay walaalki haabiil.

Ogoow kuwa ka caajisa inay quraanka ku fakaraan ama akhriyaan ayaa oolaha tusaale looga dhigay inay ku fikiraan, waxaa muuqoodu xumaaday kuwa ka jeesta oo ka caajisa akhrinta quraanka iyo mucjisada alle.

Waxaan qodob- qodob udul istaagnay mucjsiooyinka quraanka waana aragnay quraanku inuu yahay buraan wadata awoodeeda ugaarkaa hadaba maxaa kuu diiday inaad akhrsio oo barato fasirkiisa si aad unoqoto qof wax badan ka-og micnaha quraanka iyo mucjisadiisa. Aan qaybno quraanka, aan akhrino quraanka, aan barano quraanka, aan dadka barno quraanka,

Waxaa muuqoodu xumaaday kuwa ka jeesta oo ka caajisa akhrinta quraaka iyo mucjisada alle.

2. SALAADA:

Sida aynu wada ogsoonnahay salaadu waa tiir kamid ah tiirarka islaamka waana tiirka labaad marka lagasoo tago tiirka koobaad oo ah jiritaanka allaah iyo rasuulkiisa,waana dardaarankii ugu dambeeyey ee Nebigeenna muxammed (SCW)salaadaadu haday wanaagsanaato aduunka iyo mushkilaadka kadhacaya kuma warwar galinayaan waana hubka loo adeegsado dhibaatooyinka iyo caqabadaha kusoo wajaha.Tusaale hadii maantay qorshe laguu dhiibo ama lagu dhaho wax soosaar,meelku duul ama safrayso waxaad u baahanaysaa dhaqaale,garab iyo saadba in lagu siiyo

Laakiin wax walba ood rabto in aad qabsato ama dhibaato kasta ood rabto in aad xaliso waxaad saad kadhigan kartaa salaada iyo xiriirka allaah ood wanaajiso aan soo qaadanno qawlka ALLAAH markii uu la hadlayey nebigena muxammed (SCW) nebiga waxaa sahay,dhaqaale, garab looga dhigay in rabigii ku xidhnaado(Habaynkii kac oo inbadan

tuko baa lagu yiri Nebiga)si uu diinta u gaarsiiyo umadiisa waxaynu halkaa ka baranaynaa in salaadu tahay waxyaabaha naftu ku xasisho.

3. **SADAQADA**:

Sadaqadu waxay kamidtahay waxyaabaha laabta iyo qalbiga waasiciya isla markaana laga helo xasillooni, dagenaan iyo nabad gudeed waana kayd Aakhiro iyo aduunba ku anfacaya laakiin waxay kuxirantahay inaad gacan furantahay Alle dartiina aad wax ubixiso.faqrigu waa qayb kamid ah diiqada iyo ciriiriga qofku uu dareemo lakiin haddii waxa aad hayso inkastaba ha le'ekaadeene wax kabixiso waxaa hubaal ah Allena uu ballan qaaday in aad helayso wax kawayn aduun iyo aakhiraba.

Faa'iidooyinka sadaqada

Waxaan qayb ka xusidoonaa xadiisyo kasugnaaday Nebigeena muxammed (SCW)

- ✓ Qalbiga ayey kuu waasicinaysaa
- ✓ Waxaad harsanaysaa maalinka Aakhiro
- ✓ Waxaa kuu ducaynaysa maalin walba malaa'ig
- ✓ Waxay kaa difaacaysaa cadaabka
- ✓ Waxay kaa tirtiraysaa dambiyada
- ✓ Waxay kuu badinaysaa maalka

4. **INAAD DADKA SAAMAXDO:**

Erayga saamaxaad waa afcarabi micnaheeduna waxaa weeye inaad laabtaada kasiidayso qof kugu gafay si ay laabtaadu uxaadhnaato si aad unoqoto qof degen oo gudaha kadareema fudayd,farxad,degenaan,xasillooni iyo nabad gudeed, eraygan wuxuu lasocdaa cibaadada waxaa jirta erayo kale oo ay dadku badanaa ku qaldaan sida Dulqaadiyocudurdaarerayga dulqaadku wuu ka macno ballaaranyahay saamaxaada oo waxaad u isticmaali kartaa meelkasta

waana eray si guud loo isticmaalo tusaale qofbaa kuyiri isug dabadeed wuu kugu soo daahay waxaad tiri waan udulqaadanayaa,qorax baad istaagtay waxaad tiri waan u dul qaadanayaa erayga kale waa cudurdaar tusaale qofbaa wax kugu duftay ama wuu kucaayey waad iska daysay waxaad usamaysay cudurdaar kaasoo ah lagayaabaa inuu waalanyahay waa cudurdaar halka erayga saamaxaduna uu yahay wax ku abuuran qofka oo gudihiisa ku jira ama uu kadhexeeyo labo qof sidaa awgeed baanu uleenahay dadka saamaxaada badan leh badanaa waa dadka xasilloon waa dadka guuleysta waa qofka og hadii qofkankale la xifaaltamo inuu ka mashquulayo hawlihii iyo hadafyadii uu islahaa aad gaartid.

CUTUBKA 14AAD

MUSTAQBALKA NAFTA

Cutubkan wuxuu soo koobaya macnaha guud ee mustaqbalka nafta waxaana muhiima inaan iswaydiino maxay tahay sababta uu iinsaanku uraadiyo mustaqbal ifaya, sidoo kale yay tahay cidda yeelata mustaqbalkaba?

Aan jawaabo uhelno su'aalahaas inagoo dhan walba ka eegana mustaqbalka iinsaanka, bani'aadamka kolkiisa horeba naf ahaantiisa ayaa u abuuran qaab himmo sare ah waxaana qof walba Alle (sw) uu siiyay fidro caalami ah oo uu dadka kale kaga duwanyahay fidradaas oo ah middi uu ku raadicayn lahaa mustaqbalkiisa tooshna u ah si uu ugaadho iftiinka guushiisaasaga ayayna qusaysaa qofka himmadaas iska roga oo iska duleeya oo side qofku isaga dulayn karaa oo isaga baabi'in karaa himadiisa? Wuxuu isaga baabi'in karaa isagoo iska dhiga qof aan himaba lahayn oo kolkiisii horaba lagu abuudhin lahayna hadaf iyo caqli weeleeya himadiisa saxdaa Taasina waa baabi'inta himmada qofka, muhiimadu waa inaan si saxa u ogaano waxaan mustaqbalka urabno , basharku wuxuu mustaqbalka uraadiyaa si uu naftiisa ugu hubsado goob sare una gaadho halkay naftiisu ku taamaysay in badan mustaqbalku sidiisaba waa gaadhida yoolkaaga iyo halkaad ku dambaynayso aakhirka haday ahaato khaatumo wanaagsan ama khaatumo xun ,

Basharku wuxuu mustaqbal yeeshaa kolkuu fahansanyahay naftiisa iyo fidradiisa caalamigaa inay tahay mid wax lagu badali karo naftiisaba haba ugu horaysee!.

Waxaana kadambaysa qofku inuu yeesho mustaqbal sare hadba sida uu uhelo himmada rabi iyo fidradiisa hadafkana uraadiyo garanayana inuu leeyahay fahan dheeraad ah oo uu wax ku kala badali karo "HAA"iyo "MAYA" na ku dhihi kara mustaqbalkaas ayaan rabaana ku dhihi kara.

Mustaqbalkaagu wuxuu ku xidhanyahay waxa aad maanta samayso.

Mustaqbalka dhabtaa.

Qof walba oo bani'aadam ah wuxuu isleeyahay dunida meel ayaad ka leedahay oo meel ayaad ka dagantahay waase sax balse waxaaa jira mustaqbal dhaba iyo aayatiin dambe oo bani'aadamku heli doonaan waana mustaqbalka aakhiro iyo meesha uu qof walba ku dambaynayo , mustaqbalkaasna waxaa hogaaminaya cidda uu yahay qofku iyo waxa uu munawarkiisu ahaa kolkuu adduunka joogay sideedaba waxaa laga maarmaan ah qofku inuu leeyahay saddex arimood si uu unoqdo hogaamiye hogaansada mustaqbalkiisa iyo aayatiinkiisa dambe.

1. **Inuu arimiyo dhamaadka mustaqbalkiisa**
2. **Inuu leeyahay afkaaro quseeya mustaqbalkiisa**
3. **Inuu dan iyo damac kaga jiro mustaqbalkiisa**

Qofku haduu saddexdaas weeleeyo yahayna qof leh arimahaas waxaa biyo kama dhibcaan ah inuu noqon doono qof si dhaba ugu guulayaysta mustaqbalka aakhiro hadaba isku day inaad iska baadho ama lahaato arimahaas si aad ulahaato qalbi iyo maskax mutaqbalkeeda weelaysa.

Cilaaqaadka ka dhexeeya adduunka iyo aakhir waa

Adduunku waa dariiqii aakhiro loo marayay haday cibaado tahay iyo haday tahay mustaqbalkiisa dambeba, mu'minka dhabta ahi waa kan noloshiisa ku saleeya siduu ufahmi lahaa danta alle ka leeyahay

iskuna hawla raali galinta rabbigiis ileen iyaduba waa mustaqbalka qayb kamidee sidaa la'aadigeed waxaan ubaahanahay inaan fahano mustaqbalka waynee dambe iyo hadafka uu wato si aan unoqono kuwo ku guulaysta mustaqbalkooda dhabtaa adduun iyo aakhiro.

JOOJI CABSIDA MALA'AWAALKAA:

Waxaa bilaa shaki ah dadka badankooda waxaa udiida inay hormar naftooda gaarsiiyaan ,inay isbadal sameeyaan ,inay naftooda kobciyaan inay tahay cabsi ay kacabsanayaan inay fashilmaan, cabsi ay kacabsanayaan inay baahiyoobaan,cabsi ay kacabsanayaan inay dadku dhaleeceeyaaan iyo cabsiyo kaloo fara badan hadaba jooji cabsidaas mala'awalkaa si aad urumayso riyooyinkaaga iyo hadafyadaada nololeed ogoow inta aad cabsanayso waa inta aad dhulka sii taalo oo aad tahay qof curyaana oo aanan waxba qabsan karin.

Hadaba walaal ma cabsibaa kaa hortaagan inaad xaqiijiso hadafkaaga, cabsidu waxay dishaa riyada waxay baabi'isaa rajada waxay qofka ka dhigtaa qof iska fadhiya cabsidu waa waxa ka hortaagan qofku inuu gaaro halkuu rabay.

Dad badan waxay sameeynlahaayeen oo ay gaari lahaayeen waxay ooga joogsadeen cabsi ah armaad gaari waydaa, armaada fashilantaa ,armay dadku ku dhaleeceeyaan waxaad ubaahantahay geesinimo aad ku raacdo waxa qalbigaaga ka gurxamaya oo khayr iyo hormar kuu ahway garanayaan cida aad tahay sidoo kale way garanayaan waxaad rabto dhab ahaantii inaad noqoto ama aad rabto inaad samayso waxa kaliya oo ku celinaya ayaa ah cabsida waxaad ubaahantahay geesinimo aad go'aan ku gaarto,waxaad ubaahantahay geesinimo aad naftaada kaga adkaato,waxaad ubaahantahay geesinimo aad ku tiraahdo maya.

jooji cabsida ,noloshu waa safar gaaban safarkaasoo qurux badan adiga kaliya ayaana ka masuula inaad tayayso ama aad talo xumaato oo tub qaldan aad raacdo ,haka cabsan mustaqbalka haka baqin fashil ama diidmo ,haka cabsan waxay dadku ku oronayaan dadku inta badan ma jecla inay runta arkaan ama maqlaan sababtoo ah waxay ka cabsanayaan in khiyaaliga iyo dhalanteedka ay ku jiraan la burburiyo laakiin adiga hadii aad rabto inaad guulaysto oo aad isbadasho ku dhaqan hal sharci oo ah naftaada been ha usheegin runtana haka cabsan xusuusnoow geesimadu maahan inay cabsi ka marantahay ,geesinimadu waa inaaad wajahdo wax kasta oo aad ka cabsanayso ,waa inaadan u ogolaan inay cabsi ku joojiso dad kala duwan oo cusbitaal yaala ayaa lawaydiiyay ma jiraan wax aad ka qoomamaynaysaan waxay yidhaahdeen haa waxaan ka qoomamaynaynaa fursadihii dahabiga ahaa ee nasoo dhaafay cabsi nahaysay darteed noocii nolosha runta ahayd ee qalbigeenu rabaya inaan ku noolaan oo aynu ka cabsanay iyo go'aanadii aan sugnay waqti dheer inaan qaadano.

Haka cabsan inaad isbadal iyo hormar samayso caqabadaha ugu waawayn ee guusha waa cabsida, waa inaad yeelataa awood aad ku wajahdo wax walba oo aad ka cabsan jirtay waa inaad yeelataa karti aad aad ku diidi kadho waxaadan rabin, waa inaadan ka cabsan hadalada dadka ogoow dadkoo dhan haday isugu yimaadan inay wax ku yeeleeyaan oo ku dhaleeceeyaan waxna kuma gaarsiin karaan intii Alle kuu qoray mooyee ha cabsan adigu waxaa tahay geesi.

"JOOJI CABSIDA DHALANTEEDKA AH"

GUNAANAD

Buugaan waxaan uqornay sida ugu haboon oo ugu wanaagsan waxaana jihaad lagalnay inaan kala fogayno nafta iyo shahwaadkeeda, waxaa ladoonayaa akhristaha akh risanaya buugan inuu xafido waxaa ku jiro aayado quraana quraankuna wuxuu mudanyahay in marwalba kor laga yeelo ilaalintiisu waa waajib akhriste".

Waxaan qalinkayga uisticmaalay dhiiranida dhalinyarada iyo dhoolatuska shaqsiyaadka naftooda maamulay gartayna qiimaha naftoodu leedahay. dhalinyaradu waa inay yeeshaan dhiiranaan ay ku ogaadaan qiimaha naftooda, waa inay yeeshaan dhiiranaan ay wax ku ikhtiraacaan ,dhiiranaan ay wax ooga soo saaraan meel aanan waxba laga soo saarikarin cida bulshada hormarin kadha waa dhalinyarada , dhalinyaraduna waa inay ayagu naftooda hormariyaan si ay diintooda ,dadkooda iyo dalkooda u hormariyaan.

Waxaan kusoo gunaanudayaa kalmadahayga qalinkaygani waa aragti dheeryahay waxaana lajaar ah maskax aan daalayn oo utaagan hormarinta naf walba oo ubaahan inay wax kafahanto nafsadeeda, saaxiib waxaan ahay saaxiib wanaagsan oo kugu dhiirigalinaya inay indhahaagu qabtaan wanaaga iyo wixii uroon ruuxda,sidoo kale waxaan gunaanadkayga ku darayaa inaad naftaada usheegto sharkeeda iyo khayrkeeda kuwaasoo dunida uyaala waxaa loo baahanyahay dhalinyaradu inay fahmaan camaliyada taala dunidan marwalbana xusuusnaadaan aakhiro iyo halka dambaysa war wax waad qabsan kadhaane qabsada.

Waxaan kuu sheegayaa labo qaacido oo aan doonayo inaadan kala qo-qobin ahna hadalkaygii ugu dambeeyay ee aan kuu sheego si kastaba ha ahaatee labadaas qaacido waxay yihiin,

dadku way isbadal badanyihiin ee adiga qiimahaaga nafeed haka dhex eegin wajiyada dadka kale

_cid walba xidhiidhi xitaa hadaa doonto ilaw laakiin marnaba ha ilaawin hana nusqaamin xidhiidhka Alle {sw}.

Waxaa la yidhi hadal nin badiyay mawada dhihin nin soo gaabiyayna kamawada tagin naftayda iyo naftiinaba waxaan xasuusinayaa dardaarankii nabiga (scw) ee ahaa “ilaahay xafid asaguna wuu ku xafidayaaye iyo ballanta ilaahay shardiga ku xidhan ee uu ahaa inuu yidhi waxaan ka arsaaqayaa oo kaa quudinaya meel uusan garanay aadane kaasi waa qofkii adkeeya xidhiidhka ALLE sw”.

:Dhiganahani wuxuu utaaganyahay iftiiminta ruuxigaa ee nafteena sida sumadiisa ka muuqatana waa bar-bilawga nolol baraarugsan Alle dhammaanteen ha inaga yeelo kuwa ka hela nafci dhaxal gala:

Bashiir Cabdi xirsi "ciil-tire"

"
HAN DADAALA YEELO

NAAD HEEGO GAARTANA

HANKA LAGAMA GOOYEE

QAYRKAA HAREER SOCO"

GARO QIIMAHA NAFTAADA

1. **Xigasho :-**
   sheikh mustafe ismaciil haaruun
   HANKA SARE IYO QODOBADIISA
   HANKA SARE PAGE:**40**
2. **xigasho :-**
   mubarak haadi
   Weedha PAGE:**8**
   “Socdaal weeyo noloshuye”
3. **yasir mukhtaar maxamad iyo Abdishukur maxamuud**
   Tobabare nololeed
   Qisada mrs;**AANA ANDROVA**
4. **Odhaah:-**
   QORAA: **HABOON MUUSE YUUSF**
   Aqoonyahan: **CABDALLE CABDIRISAAQ XIRSRI**
5. **Akhristayaal war-celineed:-**
   A.jaamac burhaan daahir
   Cabdalle cabdirisaaq Xirsi
6. **MAWDUUCA:-**
   DHIIRIGALIN, KALSOONI IYO QIIMO NAFEED
7. **QORAAGA BUUGA:-**
   BASHIIR CABDI XIRSI “CIIL-TIRE”
8. **TAAGEERIDA IYO SOO BAN-BIXIDDA BUUGGA:-**
   -DHALINYARADA
   -QOYSKA
   -ASXAABTA
   -MACALIMIINTA
   -WAX GARADKA IYO AQOON-YAHANADA
9. **NASIIBKA IYO CIDAY USOO HOOYATAY AQOON &CILMI NAFEED OO DHEERAAD AH**
   WAA AKHRISTAHA WANAAGSAN WIIL IYO GABADHBA.

:- All rights reserved ©

Xaquuqda Daabacaada Buugaan Way dhowrsantahay, Waxayna gaar u tahay qoraaga buuga, Lama Copy - gareeysan karo qaabkasta, ayadoona fasax ama idan laga haysan qoraaga buugga.

DAABACAADII 1AAD:2021

Tixraac: bashiircabdi12@gmail.com

_Jaldiga buuga waxaa qaabeeyay qoraaga buuga iyo madbacadda

Ciddii ubaahata buugaan waxay inagala soo xidhiidhi kartaa tiradaan

+0907503249 ama tixraacan__ bashiircabdi12@gmail.com